
707 XIKMADOOD



CABDIRISAAQ JIDHI

707

XIKMADOOD

707

XIKMADOOD

Cabdirasaaq Xasan Jidhi

MAHAD-CELIN

Anigoo ah qoraaga soo uruuriyay xikmadaha iyo oraahyada ku jira buuggaan waxaan mahadda koowaad u celinayaa allihii na waafajiyay howshaan quruxda badan. Marka labaad waxaan kaloo rabaa in aan bogaadiyo dadaalkii saaxiibkay Cabdi naasir Maxamed Axmed oo ku caan baxay Nasri Juka. Runtii isaga la'aantiisa waxay howshani noqon ka lahayd mid qabyo ah. Waxaan kaloo ka mahadcelinayaa garabkii iyo taageeradii uu har iyo habeen hareertayda la joogay walaalkay marna samigay Cabdi risaaq Maxamed Geesey.

Sidoo kale walaalaha aan ku xiriirno baraha bulshada ee aan oraahyadooda dhiganahaan ku xusay oo uu ugu horreeyo Ibraahim Nolosha baan u mahadcelinayaa.

HORDHAC

Dhiganahaan la magac baxay 707 xikmadood waxaa lagu kaydiyay xikmado iyo oraahyo laga soo aruuriyay dadyoow kala duwan oo iskugu jira muslim iyo gaalo, madoow iyo caddaan, carab iyo cajam. Wuxuu qoraagu halkudhig ka dhigtay in xikmaddu tahay baadida qofka binu aadamka ah oo ay tahay inuu ka qaato meeshii uu ku arko. Dhiganahaan wuxuu kulminayaa xikmado iyo oraahyo ka hadlaya qeybaha kala geddisan ee nolosha sida, diinta, siyaasadda, waxbarashada, jacaylka iyo waqtiga. Wuxuu dhiganahaan idinka saacidi doonaa in aad hadaladiina ku qurxisaan xikmadda iyo in aad u adeegsataan oraahyadaan qiimaha badan meel walba oo aad rabtaan. Wuxuu qoraagu isku taxallujiyay inuu oraah walba xuquuqdeeda siiyo oo uu dhiganaha ku muujiyo shakhsigii ay maskaxdiisa ka soo maaxatay.

F.G. Xikmadaha lagu hoos qoray (lama yaqaan) waa kuwo aanan si sax ah loo garanayn shakhsigii gaarka u lahaa oo aanan loo tiirin karin cid gooniya, ama waa xikmado uu qoraagu garan waayay ciddii iska lahayd xuquuqdooda. Sidoo kale xikmadaha aysan waxba ku hoos qornayn waxaa inta badan iska leh qoraaga buuggan oo maskaxdiisa u shiilay si uu bulshadiisa ula wadaago hadalladii ugu qurxanaa ee laga diiwaan geliyay dadkii dunida soomaray.

Qoraagu wuxuu ka cudu rdaaranayaa gefafka iyo khaladaadka ku jiri kara buuggan xag qoraal iyo xag tarjumidba.

Waad ku mahadsan tihiin akhriska.

Qoraaga buugga

Cabdirisaaq Xasan jidhi (Aqwaan)

"Qoraagu waa sidii qorraxda oo kale oo iftiinkeedaa lagu adeegtaa marna kulaylkeedaa laga gambadaa!"

— Qoraaga buugga

AQRIS WACAN

1. Mar marka qaar nolosha kama fududa intii hore ee adiga ayaa inti hore ka adag.

2. Saaxiibka runta ah ma ahan kan wax walba u sameeyo si uu kuula dabaaldego maaalinka guushaada, balse waa kan wax uun sameeya si aadan u guuldarraysan.

3. Indhaha maangaabku waxay qabtaan caanaha uu tukuhu iska daadiyay, balse maskaxda waaya araggu waxay ka fikirtaa cimriga dheer ee uu tukuhu noolaan karo.

4. Dumarka waa sida shinnida, oo haddii guri qurxan loo dhigo oo ubax caraf badan loo geeyo waxaa laga helaa malab macaan badan, laakiin haddii qasab gacanta loogu dhigo qaniinyadeeda xanuunka badan lama mahdiyo.

5. Libaax iskuma keeni karo inuu ugaarsi tago iyo inuu ilmihiisa ilaashado.

6. Qofka aad jacaylkaada amaano uga dhigtay masayrkaada ha uga dhigin deyn, way adagtahay inuu labadaba kuu soo wada celiyo, (jacaylkii iyo masayrkii).

7. Cudurdaarka qaar waa sida tacsida oo maydku kama jawaabo.

8. Liima dhanaanta ayay udhamaatay haddii ay bolosho maxaayeelay canabku wuxuu isku beddelaa sabiib.

— Maahmaah carbeed

9. Ixtiraamku waa lahjadda ugu ballaaran luuqadda gobonnimada.

10. Ubaxa waxaa loo waraabiyaa inuu qurxanaado, geedaha waaweyna in miro laga gurto, taas ayaa ah farqiga danta iyo xarragada.

11. In aad iska aamusto oo dadkuna doqon kuu maleeyaan ayaa ka fiican inaad hadasho oo dadku xaqiiqsadaan malahooda"

— Lama yaqaan

12. Hurdo lagama dhergo daalna looma dhinto.

13. Dadka qaar ayaa ka cabanaya inaanay helin fursadihii ay uga dhabeyn lahaayeen riyooyinkooda, laakiin waxaa jira kuwo kale oo aan fursad u helin in ay hurdaan si' ayba u riyoodaan"

14. Kala taggu ma ahan wax laga cabsado haddiiba wadajirku noqdo mid lagu caajiso.

15. Indheer-garadnimadu ma ahan kala garashada qalad iyo sax, ee waa kala garashada laba qalad midka sii qaldan.

16. Shaqo waxaa ugu adag midda larabo in hal qof lagu raalligeliyo, waxaana u sahlan midda ay naftaadu ku farto oo aad u heshid daliil.

17. Kalsoonida nafta ma ahan mar walba inaad saxnaatid, waa inaadan kabaqanin inaad qaldanto.

18. Waxaa jira laba qof oo aan qalad gelin, mid waa dhintay kii kalana ma dhalanin.

19. Qoraagu waa sida qorraxda oo marna iftiinkeedaa lagu adeegtaa marna kulkeeda ayaa laga gambadaa.

20. Waa wax adag inaad goysid xarig aad hore u adkaysay oo haddana aadan helin meel aad ka gurtuntid.

21. Quruxda dumarka waa sida faynuusta, aad ayay u iftiintaa marka ay guriga dhexdiisa taallo, haddiise dibadda loo soo bixiyo way dantaa.

22. Soomaaliga south africa ka shaqeynaya waa sida qof biyo u ooman oo haddana webi dhan isku tuuraya oo wuxuu ku tashanayaa xaddiga oonka haya iyo xirfadda uu dabaasha u leeyahay, marna kuma tashanayo in webigu yahay hooygi yaxaasyada.

23. Ma noqon karo qofki aan shalay ahaay haddiiba aadan adigu noqon karin qofka aad maanta tahay"

24. Marka noloshu noqoto mid xawaare badan sida tareenka, adiguna noqo sida boosteejada. cidna ma ogaan karto dareenkaada, ma waxaa ku faraxsantahay soo dhoweynta kuwa imaanaya, mise waxaa ka murugsantahay sagootinta kuwa tegaya.

25. Layaab, tahriibe u dhimaanaya biyo la'aan, marna biyo ku maanshoonaya.

26. Daadku wuu soconayaa waxaana raacaya mallaayga midkiisa dhintay.

27. Murugada waxaa lagu daboolaa dhollacadeynta, jahliga waxaa lagu daboolaa aamusnaanta, weli lama helin xusuusta wax lagu daboolo.

28. In lawada socdo iyo in lakala haro waxaa udhaxaysa in lays nabadgeliyo, nabadgelyo aanan shuruud lahayn.

29. Ballanbaalista si' walba ay u qurxantahay waa xayawaan, tiitiinkuna si' walba uu qodax u leeyahay waa ubax.

— Lama yaqaan

30. Haddii aad haysatid hal tufaax anigana aan haysto hal tufaax oo aan kala bedelanno qof walba wuxuu haysanaa hal tufaax, balse haddii aad haysatid hal fikrad anigana aan haayo fikrad kale oo aan is dhaafsanno qof walba wuxuu haysanayaa laba fikrad.

— Goerge Bernand Show

31. Dumarka iyo khamrada waa isku mid, labadaba ragga ayay caqliga ka xadaan.

— Nazaar Qabbaani

32. Doobnimo iyo guur? u daa insaanka ha doorto midda uu ka shallaaynayo.

— Nazaar Qabbaani

33. Qof hadaa gaysid boos sare oo uusan u qalmin waxaad ka filataa inuu ku geeyo boos hoose oo aadan u qalmin.

— Cali ibnu abii Daalib

34. Waa la yaab dhaqanka bakhiilka, aduunka wuxuu ku noolyahay nolosha fuqarada, aakhiranaa waxaa lala xisaabinayaa taajiriinta.

35. Biyaha waxaa lagu nadiifiyaa wax walba marka laga reebo qalbi daxalaystay iyo carrab wasaqoobay.

36. Hanku ma ahan hunguriga loogu hawoodo hantida dadka kale, balse hanku waa awoodda lagu xaqiijiyo riyo walba.

37. Waxaan layaabay shimbiraha oo iga carara anigoo raba inaan cunto siiyo. waxay aaminsanyihiin in xurnimadu ka fiicantahay masagada.

38. Ninka ragga ah haddii uu gabadha ku doorto dhaqankeeda wanaagsan wuxuu dunida joogi doonaa asigoo hal gabar jecel, balse haddii uu gabadha kujeclaado wajigeeda qurxan dartiis wuxuu mar walba jeclaan doonaa gabar walba oo qurxan dunidana lagama heli doono gabar uu ku qanco.

— Lama yaqaan

39. Caqliyada sare waxay ka doodaan fikradaha, caqliyada dhexe waxay ka doodaan dhacdooyinka, balse caqliyada liita waxay hadlaan ashkhaasta!

— Lama yaqaan

40. Guurka weyn ma ahan marka ay is helaan laba qof oo wax walba isku si' u arka, guurka weyn ee guulaysta waa marka lamaanuhu ay aqbalaan kala duwanaanshahooda.

— Lama yaqaan

41. Ha la yaabin dooqa lamaanahaaga maxaa yeelay adiga ayaaba kamid ah.

— Lama yaqaan

42. Taariiqda laguma nooleeyo in loo labisto sida awoowahaa, balse waxaa lagu nooleeyaa in aad xaqiijiso riyooyinkiisi.

43. Dayaxyahoow ma noqon lahayn mid qurxan haddii uusan mugdiga kugu hareeraysnaan lahayn.

— Lama yaqaan

44. Lo' ul ma arooriso ee oon baa arooriya.

— Maahmaah soomaali

45. Siyaasiyiinta wa sida daanyeero beer lagu daayay oo haddii ay is dagaalaan waxay fasahaadinayaan beerta dhan, haddii ay heshiiyaanna waxay guranayaan dalagga oo dhan.

— Lama yaqaan

46. Waxay ku waydiinayaan shaqada aad qabatid si' ay go'aan uga gaaraan heerka ixtiraamka ay ku siin lahaayeen.

— Naasri Juka

47. Insaanka waxay ku qaadataa hal sano iyo bar inuu barto sida loo hadlo, balse konton sano ayay ku qaadataa inuu barto sida loo aamuso.

— Qardaawi

48. Ragga qori ayay wax ku dhacaan, dumarkana quruxdooda.

49. Xikmad walba waa hadal, balse hadal walba xikmad ma ahan.

50. Doqon dadka ayaa barta, caaqilna asiga ayaa is barta.

— Barre Maxamed Fiidoow

51. Laguma dullaysan doono haddii aadan cidna wax ka rajeyn.

— Lama yaqaan

52. Jaceylka waa waxa ugu adag ee la kasbado, waxa ugu qurxan ee la haysto iyo waxa ugu xanuunka badan ee la waayo.

— Faarax Cawaash

53. Rejadu waa sidii cusbada oo kale, kuma baahi tiri karto, balse waxay kuu macaysaa cuntada.

— Jose saramago

54. Noqo sida dayaxa, dadka ayaa madaxooda kor u soo qaadaya si ay kuu arkaan, ha noqon sida qiiqa oo isagu kor isu qaado si loo arko.

55. Daruuf jirkaada ka muuqata kuma qarin kartid labbis, waa la mid oo ladnaan jirkaada ka muuqata boor kuma qarin kartid.

56. Naag haddaadan rabin ha isku dilin, haddaad rabtana ha iska dilin.

57. Ragga waxaa u liita kuwa qaata talada xaaskooda, waxaana ka liita kuwa aanan qaadan.

— Bashiir M.xersi

58. In xorriyad hadal la siiyo qof jaahil ah waxay la mid tahay in qof waalan qori loo dhiibo.

— Nasri Juka

59. Waxaad ahaanaysaa mid cafiya qofka uu jecelyahay ilaa aad ka nacdid qofkaa.

60. Injineernimada ugu qurxan waa in laga dhiso buundooyin rejo ah bartanka webiyo quus ah.

— Lama yaqaan

61. Noloshu waa sidii iskuul, waad iska soo qori kartaa balse in aad wax ka baratid waxay ku xirantahay dadnimadaada.

— Lama yaqaano

62. Kan dhintay waa midka addoon u noqday dhaqamadiisa oo aanan iska beddelaynin kalarka ookiyaalihiisa xattaa xilliga qorrax dhaca.

— Lama yaqaan

63. Waddanka waxaa leh taajiriinta, waddaniyaddana waxaa leh fuqarada.

64. Xanuunadu waxay kaa dhigaan qof adag, qaladaadku waxay kaa dhigaan caaqil.

65. Markastood qaldantahay qiro, markastood saxantahayna aamus.

66. Ha u beddelin dabcigaaga in aad dad kale ku raalli gelisid, codkaadana inaad ku cajab gelisid, u noolaaw sida aad raalli ku tahay.

67. Qofkii raba inuu kuu soo dhowaado wuu ku soo raadinaa, qofkii aragtidaada raba wuu kuu imaanaa, kii codkaada u xiisayna wuu ku soo wacayaa, intuba ma ahan wax ay duruuftu diiday balse waa wax ay nafsaddu diiday.

— Lama yaqaan

68. Qof walba ayaa kaa farxin kara marka uu kuu sameeyo waxyaabo gooni ah, balse hal qof ayaa kaa farxin kara isagoonan waxba kuu sameyn.

— Lama yaqaan

69. Ahaaw qof adag, maxaayeelay qisadaada weli ma dhamaanin.

70. Ragga waxaa ugu liita mid fadhiisanaya si' uu uga sheekeeyo sharafta gabar uu maalin maalmaha ka mid ah ugu yeeri jiray gacaliso.

71. Iska soo af jar xiriir walba oo aadan ku dareemeyn farxad iyo degganaansho, maxaayeelay noloshu ma ximbaari karto sugitaan fara badan.

72. Malo xumadu waa cudurka dila wax walba oo qurxan.

73. Qiimo ma lahan sida ay dadku kuu arkaan inta ay ficilladaadu ku siinayaan damiir toosan.

74. Dhibicda roobka ah waxay doogasho leedahay inta aanay dhulka gaarin, qofka daacadda ahna waa sidaas oo kale oo haddii aan la daryeelin inta uu nugulyahay waxaa adag si loo dabiibo marka uu bukoodo.

75. Ma waynaanaysid ilaa aad xanuunsatid, ma baranaysid ilaa aad qaladid.

76. Magacaadu waa wax iska caadi ah ilaa uu ku dhawaaqo qof aad jeceshahay.

77. Ha ka xumaanin haddii uu ku inkiro qof aad wanaag u gashay, maxaa yeelay layrarka waddooyinkaba waa la hilmaamaa maalinkii.

78. Wixii aan adiga ku raalligelinayn haku dhibin dadka kale

79. Ruux fiican meeshii uu tagaba marti kama noqdo, ruux xumina xattaa halkii uu ku dhashay waddani kuma noqdo.

— Lama yaqaan

80. Laba arrin ayaa muujisa shakhsiyadda qofka: sabarkiisa marka uusan waxba haysan iyo dhaqankiisa marka uu wax haysto.

— Lama yaqaan

81. Dadka qaar waa sida taariikhda, lama illaawi karo lamana soo celin karo.

— Lama yaqaan

82.Saddex sabdi si' iskulama yaallaan.

— Maahmaah soomaali

83. Maalmuhu qofka ma beddelaan ee waxay soo saaraan xaqiiqadiisa.

— Lama yaqaan

84. Haddii aadan xaqqa madax u noqon karin baadilka majo ha noqon.

85. Waqtiga iyo ninku way dagaalamaan, waxaana guulaysta midkii ay xaasku la safato.

86. Bowdo rag maalinba mid ayaa qaawan.

— Maahmaah soomaali

87. Guurka waa imtixaan, waa sida adigoo dhahay waxaan jeclahay keegga oo inta cimrigaada ka dhiman keeggii afka laguugu guray.

— Qoraa ingiriis ah

88. Muusik xaaraan ah waxaa ugu xun dhawaqa malqacadaha ay taajiriintu wax ku cunayaan marka uu ku dhacayo dhegaha masaakiinta baahan.

89. Ilaa uu libaaxu ka baranayo sida wax loo qoro qiso walba waxay amaani doontaa ugaarsadaha.

90. Xafladaha waxa ugu xun waa in jaanis loo siinayo munaafiqiinta inay hab ku siiyaan ama ku soo dhoweeyaan.

91. Marka aan saxannahay qofna ma xasuusato, marka aan qaldannahayna qofna ma illaawdo.

92. Qof walba markuu dhinto wuxuu u laabanayaa xagga ilaahay, balse qofka nasiibka leh waa kan alle u laabta isaga oo nool.

93. Haddii jaceylka kala bar uu yahay xiiso, kala barka kalana waa ixtiraam.

94. Ahaaw sida roobka kaas oo haddii uu soo socdo ay dadku abshiraystaan, haddii uu yimaado lagu nacfiyo, haddii uu tago raad fiican ka taga, haddii la waayana loo xiiso.

— Dr. Cabdu qaadir Ismaaciil

95. Galayrka saddex uga dayo: aragti dheerida, isku kalsoonaanta iyo xornimada.

— Xikmad carbeed

96. Sabarku ma ahan awoodda wax lagu sugo, sabarku waa in aanan la dhuminin dhaqanka wanaagsan inta wax la sugayo.

97. Ballan ha qaadin adigoo faraxsan, jawaab ha bixin adoo xanaaqsan, go'aan ha qaadan adoo murugaysan.

— Will Smith

98. Laba qof oo keliya ayaa kuu sheegi kara xaqiiqada, waa saaxiib si qoto dheer kuu jecel iyo cadaw tabar darreeyay.

99. Faqriga ma dullayn karo nafafka awoodda leh, hantiduna ma sharfi karto kuwa hooseeya.

100. Ma guulaysanayaan inta badan kacdoonna deenna, maxaa yeelay daalimka ayaan beddelnaa ee dulmiga ma beddelno.

101. Ha la murmin doqonka, wuxuu hoos kuugu jiidayaa heerkiisa muranka, kaddibna wuxuu kugu garaacayaa khibraddiisa.

— Lama yaqaan

102. Way adagtahay inaad heshid qof ku fahma, maxaa yeelay qof walba wuxuu ku mashquulsan yahay inuu ku xukumo.

103. Faa'iido ma lahan in aad dahab heshid haddii aadanba aqoonin qiimihiisa.

104. Insaanku wuxuu ku meel maraa sabarkiisa ee kuma meel maro awooddiisa.

105. Iska illow wixii tegay casharna ka qaado.

106. Ma jirto hooyo baagamuundo ah balse waxaa jira hooyo mushaar la'aan ah.

107. Ha u burburinin waxa aad haysatid helidda wixii kaa dhumay.

108. Ha rumaysan wax walba oo aad aragtid, maxaa yeelay macquul ma ahan in mas u badbaadiyay kalluun biyo ku haftay.

109. Welwelku daawo uma ahan murugadii shalay ee wuxuu xadaa farxaddii maanta.

— Lama yaqaan

110. In aad wanaajiso qof ku wanaajiyay waa wax iska caadi ah, waxanse la gaari karin in aad wanaajiso qof ku xumeeyay.

111. Haddaad tahay qof xun waxaa ku jeclaanaya toban ruux, haddaad tahay qof fiicanna waxaa ku dhaawacaya kun qof.

112. Mar marka qaar waxaan u xiisnaa xusuusihii hore ee uma xiisno dadkii hore, maxaa yeelay dadku way is beddelaan balse xusuusuhu isma beddelaan.

113. Go'aannada qaldan waxaa ka dhasha sheekooyin xiiso leh.

114. Qofka naftiisa la xisaabtama caqligiisaa kordha, laakiin qofka dadka kale xisaabiya doqonnimadiisaa kororta.

— Diinoos

115. Si walba oo roobku ugu da'o badda haddana biyaheedu waa dhanaan, dadka qaarna waa sidaas oo si walba oo iskugu daydid in aad beddeshid ma ahan kuwo is bedelaya.

116. Haddii aad qof u aamintid si dhamaystiran waxaad filataa laba natiijo, qofka nolosha oo dhan ama casharka nolosha oo dhan.

— Lama yaqaan

117. Adduunyadu waa iskuul, maamulaheedu waa waqtiga, macallinkeedu waa calafka, ardaydeeduna waa basharka.

118. Laba qofba been ha u sheegin marka aad uga warramaysid xaaladdaada, dhaqtarka iyo qareenka.

119. Aduunyadu waa seddex maalmood; shalay waan soo noolayn mana soo laabanayso, maanta waan noolnahay mana sii jireyso, berrina ma garaneeyno halka aan ku danbeeyn doonno.

— Xikmad carbeed

120. Farqi ayaa u dhaxeeyo inaad cimriga ka kortid iyo inaad caqliga ka kortid, tan kowaad waa wax aad ku qasbantahay, tan labaadna waa waxaad dooranee.

121. Wax xikmad ah kuma jiraan in aad qaniinto eey ku qaniinay.

122. Wax beerashada waxaa looga hor tagaaa gaajada, balse waxbarashadu waxay beertaa oo sameysaa waddan.

123. Haddii aadan ku qalin jabinin fanka iska dhega tirka waxaad waayi doontaa waxyaabo badan oo uu caafimaadkaadu kow ka yahay.

— Lama yaqaan

124. Ha isku dayin in aad ku qanciso wanaagaada qof ku qanacsan inuu kugu sifeeyo xumaan, maxaa yeelay qofka ku jecel maba kaa malaysanayo wax aan wanaag ahayn.

125. Marka aad maqashid addinka salaadda subax waxaa hortaada yaal laba khiyaar, in aad sii hurudid oo sii riyootid, iyo in aad hurdada ka kacdid oo riyadaada xaqiijisid!

126. Qofka aanan u arkin xiriirkaada faa'iido uu haysto, adiguna tegitaankiisa ha u arkin khasaaro kuu soo hoyatay.

127. Wanaag haddii ay kaa maqlaan way qarinayaan, xumaan haddii ay kaa maqlaan way faafinayaa, haddii aysan wax kaa maqlinna iyagaa kugu been abuuranaya.

128. La sheekeyso kuwa kuu imaada marka ay jaaniska hayaan, tix geli kuwa kuu imaadaa waqtiga aad adigu jaaniska u haysid, balse ku mintid saaaxiibtinimada kuwa dartaa waqtigooda u soo firaaqeeya.

129. Dameerka ha soconin gadaashiisa, dibiga ha soconin hortiisa, jaahilna dhanna ha ka soconin hore iyo gadaalba.

— Lama yaqaan

130. Kalsoonida dhuntay waa sida warqaddii oo kale, waa la jar jari karaa balse lagama dhigi karo sidii ay ahayd.

131. Nafta in la sharfo ma ahan in hadal macaan lagu hadlo ee waa in laga fogaado wax walba oo hoos u dhigaya qiimahaada dadnimo.

132. Noloshu waa sida badda oo kale, mar way kacsantahay, marna way degantahay, haddii kor laga arkana way qurxantahay, balse haddii aad dhex gashid wax walbaa ayaad kala kulmi kartaa.

133. Noqo sida lambar kow oo kale, si' walba oo loogu dhufto lambarrada waaweyn ee xisaabta midna ma siinayo wax ka badan xajmigiisa.

134. Xiriir walba billowgiisa waxaa la bartaa daareemada dadka, balse dhammaadkiisa waxaa lagu bartaa akhlaaqdooda.

135. Arigu noloshiisa oo dhan wuxuu ka cabsadaaa in uu dhurwaagu cuno, balse marka u dambaysa waxaa cuna qowsaarkii ilaalinayay, ka digtoonow cidda aaad kalsoonida siinaysid.

136. Waxaa wax weyn ah in aad wax bixisid inta aanan lagu waydiisan, waxaa qurux ah in aad wax u jeclaatid shaki la'aan, waxaase cajiib ah in aad qof ula saaaxiibtid danaysi la'aan.

137. Ka digtoonow saaxiibkaada in ka badan cadawgaada, maxaa yeelay shiishka cadawgaadu wuxuu xanuujiyaa jirka, balse shiishka saaxiibku ma gefo wadnaha.

138. Hadalka dadku waa sidii dhagxaan culus, khiyaar ayaad u leedahay in aad dhabarkaada ku ximbaartid oo dhabarku uu kaa jabo iyo in aad ka dhigatid jaran jaro aad hadafkaada ku gaartid.

— Lama yaqaan

139. Waxaa jira dad aan jeclaan lahaay inaan dhaho barashadiina waan ku faraxsanahay waxaana rajaynayaa in aanan mar dambe kulmin.

— Bob Marley

140. Munaafiqiintu waa kuwa dhurwaay walba la cuna hilibka neefka baadida ah, kaddibna la ooya qoowsaarkii uu neefku ka soo dhumay.

141. Ruuxii wanaajiya wixii ilaahay kala dhaxeeya, ilaahay ayaa u wanaajiya waxa dadka kala dhaxeeya.

142. Joogteey xamaasadaada nafeed adigoo dib u jaleecaya guulaha aad gaartay.

143. Cawradaada qarso in aad dumarka ku dhahdid waxaa ka horaysa inaad aadiga jeesato oo indhahaada aad asturtid.

— Diinoos

144. Waa kala labo dulqaad iyo sabar, dulqaadku wuxuu yimaadaa markii qofku uu xanaaqo, sabarkuna waa markii qofka ay musiibo ku dhacdo.

145. Geesinimo muuji marka madaxa lagaa goynayo oo kor eeg si' kuwa dulinimada ku hoos jira u dareemaan in xattaa si' sharaf leh loo dhinto.

146. Sakiintu waa ka af badantahay masaarta balse geed ma goyn karto, masaaartuna waa ka xoog badantahay sakiinta balse tin ma xiiri karto, baro in qof walbaahi uu meel ku wanaagsan yahay.

— Lama yaqaan

147. Dunidu waa sida filim oo kale, noqo jilaa khatar ah ama daawade akhlaaq leh.

148. Dumarku waxa ay sugaan ragga ragguna waxa ay sugaan rajada.

149. Haddii aanad jeclayn dumarka, cabitaanka iyo xikmadaha waxaad nolosha ku dhamaysanaysaa waalli.

— Maxamed Waayeel

150. Jaceylku waa sida daawada, oo xanuunka ku haaya waa ay daaweyn kartaa waana uga dari kartaa.

— Lama filaan

151. Sabarku wuxuu u qaraaryahay sida sibirka, balse natiijadiisu waxay u macaantahay sida malabka.

— Gabay carabi ah

152. Xikmaddu waxay fuqarada fadhiisisay booskii boqorrada.

153. Wax la dhadhamiyo waxaa u qaraar faqriga, wax la qaada waxaa u culus deynta.

154. Iska ilaali inaad saaxiibkaa deymisid lacag oo markaa aad waysid labadiiba, saaaxiibkii iyo lacagtii.

— Shakespear

155. Waxay ahayd labaatan sano ka hor markii ugu fiicnayd oo ay ahayd in geed mirood la beero, balse hadda ayaa ah waqtigii labaad ee ugu fiicnaa ee adigu geed beer.

156. Qof tabar daran ha tusin awoodahaada oo dhan, farxadaadana ka ilaali qof murugaysan.

157. Mar walba u shaqayso sida ninka ubaxyada iibiya kaas oo haddii ay faa'iidadu dhaafto aysan dhaafaynin carafta ubaxu.

158. Haddii dadku kuugu fanaan hadal qurxanaantooda; adiguna ugu faan aamus qurxanaantaada.

— Luqmaanul xakiim

159. Sii jacaylkaada qofka xiisaynaya farxadaada, sii saaxiibtinimaada qofka qariya sirtaada, sii waqtigaada qofka kaa hormariya qayrkaa, qalbigaadana sii qofka aanan la'aantaaa noolaan karin.

160. Dadka waxaa ugu xun qofka aanan cidna ku kalsoonaanayn malo xumadiisa awgeed, isagana aanan lagu kalsoonaanayn dhaqan xumadiisa awgeed.

— Cali bin abii Daalib RC

161. Taqwadu waa in alle laga cabsado, in qur'aanka lagu camalfalo, in wax yar lagu raali noqdo, iyo u diyaar garowga maalinka dhimashada.

162. Maanta ka qaado cibro, shalayna khibrad.

163. Dadka waxaa shaki gelin kara hadalkaada, maya ficilkaada.

164. U dhaqan sidii inaad ku kalsoontahay cid walba, balse ha ku kalsoonaan.

165. Dadka midka kuugu dhow masaafo ahaan ayaa noqonaya midka kuugu fog, halka midka ugu fog uu noqon karo kan kuugu dhow, dhowaanshuhu waa dareen ee ma ahan joogitaan.

166. Dadku daacad kuuma ahan adiga, waxay daacad u yihiin danahooda, keliya in ay dantoodu isbedesho ayayna ku xiran tahay in daacadnimadoodu isbedesho.

167. Ka hor inta aadan aqoonyahay noqonin waxaad noqotaa qof xurmad leh, maxaa yeelay ixtiraamku waa qeyb aqoonta ka mid ah.

168. Dhibaatadaadu ma ahan sanadihii tegay ee kaa dayacmay, balse waa sanadaha soo socda ee aad ku wajihi doontid isla caqliyaddii hore.

169. Haddii dadku ay iskaga tegi lahaayeen wax walba oo ku adkaada, diin iyo duni midna uma badbaadeen.

170. Deyn walba waa suurtagal in la gudo marka laga reebo deynta ay hooyooyinku ku leeyihiin ubadkooda.

171. Qofka ku siiya hal cudurdaar oo been ah si' uu kaaga tago waxaad siisaa kun mahadnaq oo uusan kuugu soo laaban.

172. Qof walba oo aanan waqtiga maalinka saddex u dhig firaaqo heli karin waa addoon.

173. Ma jiro waddan magaciisa la dhaho sabool, waxaase jira nidaam ku fashilmay inuu hagaajiyo maamulka waddankaas.

174. Qasab ma ahan in aad daba-dhilif u noqoto cadawgaada si'aad danahooda u fulisid, waxaa kugu filan keliya inaad doqon noqotid.

175. Jahliga waxaa lagu qiyaasaa aflagaadada ka soo baxda qofka ama gefafka marka uusan heli karin cadaymo uu isku difaaco.

176. Libaaxu naftiisa kuma mashquuliyo fikradaha wananka, qofka naftiisa ku kalsoonina ma daan-daansado dadka kale.

177. Wax walba waxay leeyihiin fursad labaad marka laga reebo kalsoonida iyo runta, labadaasi sooma laabtaan xattaa kun fursad haddii la siiyo.

178. Dhabarkayga ugama cabsano cadaw aan is hayno sida aan xabadkayga uga cabsado saaxiib aan isku fiicannahay.

179. Mid walboo magaca rag loogu yeero raagannimo ma lahan, maxaayeelay kelimadda shimbir waxay kulmisaa gorgorka iyo doorada.

180. Culumada kula fadhiiso caqligaada, madaxda kula fadhiiso cilmigaada, saaxiibadaa kula fadhiiso edebtaada, haddii aad jaahiliin la fadhiisatana kula fadhiiso dulqaadkaada.

181. Haddii sheeko walba loo rogo isfaham la'aan xataa aamusnaanta ayaa qalad laga fahmayaa.

182. Dadka wax khiyaama waa afar: mid awood leh oo aan dadka wax tarin, hantiile aanan wax bixin, fadhiid aanan wax isku dayin iyo carrab aanan hadlin.

183. Quruxdu ma ahan dharka aan xiranno, quruxdu waa cilmiga iyo aadaabta.

— Cali ibnu abii Daalib RC

184. Ha nacladin waqtiga ee u mahadceli, maxaa yeelay isaga ayaa ah midkii daaha kaaga qaaday xaqqiiqada dadka hareerahaada jooga.

185. Xiriirku waa sida guri, markii ay gubato laambadda nalku inta baxdid sooma iibsatid guri cusub ee waxaad bedeshaa laambaddii.

— Lama yaqaan

186. Waddo walba waxay dowladdu ku qortaa "xawaaraha socodkaada dhin" balse waddada xagga rabbi aada wuxuu ilaah yiri " u soo degdega dembi dhaafka".

187. Doqonnimadu waa in aad isku dhibtid inaad isu muujiso sida ay dadku rabaan oo markaas aad hilmaantay in kuwa ku jecel ay shakhsiyadaada kugu aqbali doonaan.

188. Waa adiga midka ka cabsoonayay in ay noloshu dhaawacdo oo ugu dambayn-tiina uu qalbigiisu dhaawacay.

189. Kan dadka u dhimriya waa kan naftiisa ku kalsoon, kan isla waynina waa kan og nusqaanka noloshiisa ku jira.

190. Qalbigaada nadiifi jirkaada ka hor, carrabkaada nadiifi gacmahaada ka hor oo wanaaji malaha dadka.

191. Qofkii ku istaaga murugadiisa dusheeda wuu guulaystay, qofkii ay murugadu ku fadhiisatana waa jabay.

192. Waxaan u safarnaa daafaha caalamka si'aan u aragno wax qurxan, balse qofkii aanan naftiisa qurxini ma arki karo qurux kale.

193. Caqli midka ugu xumi waa kan muranka u beddela khilaaf joogto ah.

194. Shay walba oo laba u qaybsama wuu yaraadaa farxadda ma ahane, haddii ay qaybsanto farxaddu way badataa.

195. I jeclaaw ama i nac labadaba waan doorbidayaa, haddii aad i jeclaatana qalbigaada ayaan ku jirayaa, haddii aad i nacdana maskaxdaada.

— Alberto Elestein

196. Sirtaada uga tag adiga iyo rabbigaa dhexdiina, ha na ka cabsanin faqri iyo geeri, ku dadaal hooyo iyo aabbe, kaalmayso salaad iyo samir, ha sheegin dadkii ku xumeeyay iyo dadkii aad wanaajisay labadaba.

— Cali ibnu abii Daalib RC

197. Doqomada iyo jaahiliinta ayaa jecel dimoqraadiyadda, maxaa yeelay waxay la simaysaa culumada!

198. Haddii aad rabtid in amarkaada oo keliya la qaato noqo tima-jare, haddii aad rabtid dadka dhan in aad ka farxisana noqo jallaatoole.

199. Ku dhoollacadeey qofka aad jeceshahay hortiisa wuxuu dareemayaa jaceylkaada, cadawgaada hortiisa wuxuu dareemayaa itaal darridiisa, qofkii kaa tegay hortiisa wuxuu daareemayaa shallaayto.

200. Haddii aadan hanti haysan dhib ma lahan, haddii aad xanuunsan tahay oogaa waa dhib, haddiise aadan akhlaaq lahayn wax aad leedahayba ma jiraan.

— Cali ibnu abii Daalib RC

201. Qaxwo in la cabo muhiim ma ahan, waxaa muhiim ah qofka mudan in lala cabo.

202. Daqiiqad la sabro marka la xanaaqo ayaa ka hortag u ah kun habeen oo la shallaayi lahaa.

203. Marka aad ogtahay in jawaabtu ku dhaawici doonto ixtiraam qalbigaada oo su'aashaba iska illow.

204. Xuduudaada in aad garato ayaa wanaagsan, waxaaase ka sii wanaagsan in aadan ka tillaabin.

205. Maanta oo kuu qurxan ha u bur-burinin shalay oo xumeed daarteed.

206. Mar walba oo aad wax bixiso adiga oo aanan wax ku bedelanaynin waa mar walba oo uu rabbi ku siiyo adiga oo aanan filanaynin.

207. Waqtiyadii hore in la hurdo waxay ku xirneed in faynuusta la iska damiyo, maantase markii aan nalalka daminno ayuu qalbigu shidaa shumaca fikirka.

208. Saaxiibkaada waxaad ku garataa ficilkiisa ee kuma garatid hadalkiisa, kan ku jecelna xiisihiisa ee ma ahan carrabkiisa.

209. Qofna ha ku qasbin inuu dartaa u sameeyo waxyaabo uusan rabin samayntooda, maxaa yeelay waxyaabaha qurxan waxay yimaadaan dalab la'aan.

210. Qof waxaa jira jaceylka u arka nolol, iyo mid kaloo u arka been, labadooduba waa saxan yihiin oo kan hore wuxuu la kulmay jaceylka ruuxdiisa, kan labaadna wuu waayay jaceylkiisi.

211. Masaafada ugu dheer ee laba qof ka dhaxaysa waa isfaham darrada.

212. Iska indhatirku wuxuu dilaa xiriir walba si kasta oo uu u xoogan yahay, xiisuhuna wuxuu abuuraa xiriir walba si' kasta oo uu u ahaa mid aan suurtagali karin.

213. Qare iyo naagba qurux laguma raaco.

— Maahmaah soomaali

214. Qofka kuu dulqaata adigoo xanaaqsan, kuu dooda adigoo maqan, kaa qosliya marka aad murugaysantahay, iska jir in aad lumiso qofkaas.

215. Qofka raba inuu noloshaada ka baxo waa midka albaabka oo kuu xiran darbiga ka booda, midka raba inuu noloshaada soo galana waa kan albaabka oo xiran saqafka kaaga soo dhex baxa.

216. Qamaariistuhu waa qof ku raaxaysanaya isku daygiisa oo dhan, hadduu guuldarraysto cashar ayuu ka qaataa, haddii uu guulaystana hore ayuu u sii socdaa.

217. ilowshuhu wuxuu ka billowdaa marka aan xusuusanno oo aanan xiisaynin.

218. Waxyaabaha ugu xun nolosha waa riyo uusan taageeraynin rabitaanku.

219. Ha jeclaanin qof sabool ah, haddiiba riyooyinkaadu ka badan yihiin jacaylka.

220. Ibnu aadanku wuxuu dhashaa isagoo gacmihiisu laabanyihiin oo ku dadaalaya in uu adduunyada wax ka aruursado, wuxuuna dhintaa isaga oo gacmihiisu fidsanyihiin oo aan wax hanti kala tegin aduunkii.

221. Waa wax liita in aad dhaawacdid dareenka dadka adigoo leh sidaas baa dabeecadayda ah.

222. Qalbigaada ka xoreey nacaybka, caqligaada ka xoreey murugada, u nooloow si' fudud iskana yareey in aad dadka kale ka filato in ay wax ku siiyaan.

223. Haddiiba lugahaadu ay dhulka raad uga tegi karaan, carrabkaaduna saameyn ayuu uga tegi karaa qalbiyada dadka kale.

— Lama yaqaan

224. Mar uun waad ogaanee in ixtiraamku uu ka muhiimsan yahay jacaylka, is fahamkuna ka fiicanyahay isku qalmidda, kalsooniduna ka fiicantahay masayrka, dulqaadkuna yahay wadada ugu weyn ee wax walba lagu gaaro.

225. Noloshu wax walba kuma siinayso, balse qanaacada ayaa kaa dhigaysa mid jecel wuxuu haysto.

226. Ku noolow dhowrsanaantaada, iyagana u daa dembiga mala awaalka.

227. Ha barbar dhigin noloshaada cid kale, ma jiro isbar-bardhig ka dhaxeeya qorraxda iyo dayaxa, mid waliba if ku filan ayuu bixiyaa waqtigiisa.

228. Dhib markuu jiro ayaa la ogaadaa sabarka, dood markii ay socota waxaa la ogaadaa caqliga, mawaaqifta qaarna waxaa lagu ogaadaa dadnimada qofka.

229. Aamusnaantu waa cibaado aan daal lahayn, qurux aanan lacag ahayn, haybad aanan jago ahayn iyo dhufays aanan derbi lahayn.

230. Qof tabar daran ha tusin awooddaada, qof murugaysan ha tusin farxadaada, baro sida loo ilaaliyo dareenka dadka kale.

231. Ku kalsoonoow in qofina uusan xiri karin albaab uu rabbi kuu furay.

232. Nin rag ah maladiisu waa meeshii ama meel u dhow.

233. Caqabaduhu geeri ama dhimasho ma keenaan, balse dilaaga noloshu waa murugada iyo welwelka.

234. Ragna waa is geddiyaa geelna waa galgashaa.

— Maahmaah soomaali

235. Aamusnaantu waxay kugu kordhisaa cudud iyo caqli fara badan, waxay si' fudud kuu bartaa cadawgaada iyo calan sidahaada.

236. Hadal qu'aan ha kaa deeqo, hurdana qabriga.

237. Ma jiro qof kaneecadu ay dhiiggiisa inta ka dharagtay ay taallo u dhistay.

238. La fadhiiso dadka caqliga badan xattaa haddii ay cadawgaada yihiin, maxaa yeelay caqligu caqli ayuu laa hadlaa.

— Lama yaqaan

239. Biyuhu waa wax jilcan haddana waxay dilaaciyaan dhulka, waxayna dhaqaajiyaan dhagxaan, waxay dejin karaan markab. Baro mabda' ah in si deggan aad kaga guulaysan kartid wax kasta oo adag.

240. Kelmadda "adigaa saxan" waa dhammaadka doodda iyo billowga nasiinada xididada maskaxda.

241. Naftaada waxa aad ka dhigi kartaa mid faraxsan ama mid murugaysan; way isla egyihiin dadaalka kaaga baxaya labadaas.

— Maxamed Waayeel

242. Hanti garaadka la mid ah ma jirto, saboolnimo jahliga la mid ahna ma jirto, dhaxal camalka wanaagsan la mid ahna ma jiro.

— Cali bin abii Daalib RC

243. Malaha caaqilka waa yaqiinta jaahilka!

244. Macno ma keenayso wayninka dhaladas haddiiba rumuutku uu yahay midka laga hagi karo.

— Siciid Waxgarad

245. Dareemadaada ka dhig sidii ilmaha yar oo kale, maxaa yeelay daahirsanaanta niyadoodu waa sidii jannadii oo kale.

246. Faqrigu wuxuu saaxiib la yahay jahliga, jahliguna waa kan horseeda cudurrada, saddexdoodu markii ay kulmaanna shacabku wuxuu ka hor yimaadaa dowladda, halkaas ayaana ah meesha uu ku dhinto dareen walba oo waddaniyadeed.

247. Qofna awood uma lahan inuu kaa qaado xanuunka ku haya, ee qofna ha u ogolaanin inuu farxadda ku tiro.

248. Noloshu kuuguma imaanayso in ay ku raalligarayso, baro in aad ka gudubtid wixii aan ku raalligalin.

249. Wixii aan adiga ku qancin ha ku dhibin dadka kale.

250. Taag darridaada u muuji allah oo keliya, dadkana awooddaada.

251. Ka digtoonoow markii aad aragtid cadawgaada oo dhoollacadaynaya, maxaa yeelay libaaxaba waxaa muuqanaya miciyihiisa marka uu xanaaqo.

252. Wixii kaa tegay ma ahan wax laguugu talagalay, wixii laguugu talagalayna ma ahan wax kaa tegaya.

253. Samafal sameey xattaa haddii aanan weligaa laguu samafalin.

254. Qofka wanaaggiisu wuxuu ka muuqdaa indhihiisa, indhuhu waa qalbigii oo banaanka yaala.

255. Ma dumayso riyo uu qofkeedii ahaa mid allaah wanaag ka fisha.

256. Qofka ku jecel kuguma madax adaygo, kaama tago, kaama iisho, qofka ku jecel wuxuu la dagaalamaa wax walba si' uu xiriirkiinnu u sii jiro.

257. Nabadgalyo dushiisa ha ahaato qofka gartay in hadalku uusan waxba soo kordhinaynin ee is kaa aamusay.

258. Xanuunka waxbarashadu waa maalmo wuuna dhamaanayaa, xanuunka iska indhatirka waxbarashaduna wuu ku haynaa weligiis.

259. Haddii aad rabtid in aadan ka shallaayin waxba, waa in wax walba aad u samaysaa allah dartii.

260. Nafsaddaada qiimo u yeel oo is qurxi ha na u soo jiidin murugo, haddii waqtigu uu dab kugu daarana adiga iyo waqtigu liddi ha ku noqonina nafta.

261. Gidaarkayga ha ku beerin qodax, lagayaabee berri in aad ii timaadid adigoo kabo la'.

— Nazaar Qabbani

262. Qorraxda ayaa soo baxaysa maalmuhuna waa sii soconayaan adiga oo nool oo maqlaya in albaabka farxaddu uu yahay u noqoshada xagga rabbi.

263. Aadaabta kama mid ahan in aad kuwa maqan ka sheegtid wax aadan sheegi karin marka ay joogaan.

264. Dameerka ayaa geesi ku soo baxaa markuu libaaxu galo xaalad adag, dadkuna waa la mid.

265. Dabeecadda wuxuu rabbi u qaybiyay sida arsaaqda, waxaa jira mid hodan ka ah iyo mid sabool ka ah.

266. Masayrka annagga ayaa abuurna markii aan qiimo u yeelno kuwo aanan waxba ahayn.

267. Khayaanadu waa in aad qof dhabarkii ku jabiso dhalo uu kaaga fogeeyay in ay ku dhaawacdo.

268. Kuma qasbanid in aad qof farax geliso, waxaa ku qasbantahay in aadan qofna dhaawicin.

269. Maalin uun markii ay wax walba hagaagaan ayaad gadaal eegi doontaa adigoo ku faanaya in aadan isdhiibin.

270. Amaan ha ka sugin dadka kale si' aad qiimahaada u ogaatid. Baro qiimaha naftaada xattaa hadaysan ku sharfin kuwa kale.

271. In aadan faragelin dadka kale afaarahooda waa waajib ee ma ahan codsi.

272. Laabtaada ha uga tegin wax xumaan ah, cafi, iska indhotir, malahaada wanaaji, maxaayeelay noloshu waa ilbiriqsiyo mudan in aan ku noolaanno laab furnaan.

273. Gefafkaada ayaa mudan in aad u ooysid dartood, ha u ooyin qof tegay ama dhintay, maxaa yeelay taas waa qaddar xagga rabbi ka qoran.

274. Markii uu kula soo gudboonaado arrin culus haddii aad isla markiiba xusuusatid allaah iyo rasuulkiisa; waad guulaysatay.

275. Aqoonta dhabta ah waa in qofku uu garto ilaa heerka ay gaarsiisantahay jaahilnimadiisa.

276. Mar walba rejo ayaa jirta in waxa dhici doona ay noqon doonaan wax qurux badan oo mudan in aan sugno.

277. Inta uu wanaagaadu la egyahay oo kale ayaa lagu imtixaanayaa.

278. Karaamadaada ayaa ka muhiimsan jaceylka, haddiiba sharaftaada la ihaanaysanayo waxaa fiican in qalbigaaada aad soo bixisid aad lugahaada hoostooda dhigtid, ha qiimo tirin nafsaddaada maxaayelay ma jiro qof sidaas mudan.

279. Awooddu waa in aad wax cafiso adigoo awooda in aad aarsatid.

280. Socdaal gal oo cidna ha u sheegin, wax jecloow cidna ha u sheegin, faraxsanow cidna ha u sheegin, maxaa yeelay dadku way fasahaadiyaan waxyaabaha qurxan.

281. Si aad u nafistid waa inaad barataa in aad iska yaraysid wax walba. Hadalka, dareenka, iyo dadka qaar.

282. Irsaaqaddaada soo daahday ayaa ka fiicnaan doonta middooda soo hormartay.

283. Maskaxda wanaagsan wax walba waxay u aragtaa fursad, maskaxda xumina wax walba waxay u aragtaa caqabad.

284. Aadaabta waxaa ka mid in aadan qofna waydiinin wax uu kaa qarinayo, maxaayeelay haddii uusan kuu sheegin kumaba quseeyo adiga.

285. Jaahilku wuxuu yaqaanaa lix waxyaabood:

1. In la caroodo sabab la'aan. 2. Hadal aan macno lahayn. 3. Wax bixin aanan meeshii u baahneed ahayn. 4. Saaxiibkiisa oo uusan cadawgiisa ka aqoonin. 5. Sirta oo la faafiyo. 6. iyo in cid walba lagu kalsoonaado.

286. Dadka waa laba nuuc: mid kuu arka in aad wax fiican tahay oo ku jeclaanaya. Mid kuu arka wax fiican inaa tahay oo ku cunaya.

287. Guur iyo doobnimo? U daaya insaanka ha doorto midda uu ka shallaaynayo.

288. Guul laguma gaaro in aanan gef lagu dhicin, balse waxaa lagu gaaraa in aanan gefkii lagu celcelin.

289. Mid ka mid ah qaacidooyinka gooni u goosatada noloshu ay ku dhaqmaan waa; in aadan marmarsiyo u yeelin dhaqamadaada maxaa yeelay xor ayaa tahay.

290. Wuu tegayaa camalka xun waxaana haraya dambigiisa, wuu tegayaa camalka wanaagsan waxaana haraya ajarkiisa.

— Xikmad carbeed

291. Marmarka qaar ma ogaan kartid qiimaha halka aad ku sugantahay ilaa ay wax walba dhamaadaan oo ay xusuus noqdaan.

292. Wixii tegay lama beddeli karo waxa soo socdana lama ogaan karo, hadda u noolaaw sida ugu qurxan.

293. In aad naftaada barato ayaa ah billowga xikmadda.

294. Sanadadu waxay na baraan wax ka badan buugaagta.

295. Maskaxda wax baratay waxaa calaamad u ah in ay ku madadaasho mowduuc aysan rejo ka qabin in ay aqbasho xaqiiqadiisa.

296. Sirta noloshu waa in aad toddobo mar dhacdaa, iyo in aad siddeed mar soo kacdaa.

297. Heer walba oo ka sarreeya habka aad hadda u nooshahay wuxuu dalbanayaa adiga oo nooc kale ah.

298. Qof walba oo dadka kale eega waa mid riyoonaya, qofkii naftiisa eegana waa mid hurdada ka kacay.

299. Marka aad ugu cabsida badantahay waa marka aadanba waxba billaabin.

300. Waddooyinka waxaa loo sameeyay in lagu socdo.

301. Baro in wax la iibiyo iyo in wax la dhiso, maxaa yeelay labadaas qofkii yaqaana waa lama joojiye.

302. Annaga oo dhan dhulka ayaynu joognaa, farqiga ayaa ah in qaarkeen ay xiddigaha eegayaan.

303. Ha ku qiimaynin maalmaha dalagga ka soo go'a wixii aad beeratay ee ku qiimeey inta xidid ee aad abuurtay.

304. Dunidu way ku filantahay damaca dadka ku nool oo dhan balse dunidu kuma filna damaca uu hal ruux wato.

— Mahatma Gandi

305. Markabku mar walba xeebta wuu ku bed qabaa balse looma sameeynin inuu xeebta iska yaalo.

306. Dayaxa tilmaanso, haddii aadan haleelin dhib malahan oo xiddigaha ayaad ka mid noqonee.

307. Dadka qaar iyagoo arkaya waxa koonka saaran ayay kuwaydiinayaan sababta, dadka qaarna waxay ku riyoodaan wax aanan hore koonka uga jirin waxayna is waydiiyaan WHY NOT!.

— Goerge Bernand Show

308. Noqo qofka aad tahay, sababoo ah qof walba oo aad rabtid in aad noqotid hore ayaa loo noqday.

309. Sii dadka sabab ay kuula joogaan ama baalal ay ku duulaan.

310. Neefso, waxaa laga yaabaa in ay maalin xun tahay ee ma ahan nolol xun.

311. Qof walba wuxuu dhashay isaga oo ooynaya, dadka qaar baa ooyinta ku sii jiraya.

312. Doofaar ha la lagdamin maxaayeelay waad ku wasaqoobaysaa isaguna wuu ku farxayaa taas.

— Lama yaqaan

313. Haddii aad runloow tahay uma baahnid in aad wax xusuusatid.

314. U fikir sida caaqil, balse dadka kula hadal luuqaddooda.

315. Baro sida wax loo dhagaysto, waxaad ka faa'iidi doontaa xattaa kuwa sida qaldan u hadla.

316. Qofka bixiya raalligelinta ugu horreeysa ayaa dadka ugu geesisan, qofka bixiya cafiska ugu horreeya ayaa ugu adag, qofka iska illoowa xumaantii lagu sameeyay ayaana ugu farxad badan dadka.

317. Ha aaminin in aad qaadatay go'aankii ugu saxnaa, keliya go'aan qaado kana dhig mid sax ah.

318. Noloshu waa sidii buuggii, uma gudbi kartid bog cusub adigoo weli akhrinaya boggii hore.

319. Waa in aad leedahay riyo si' aad subax hore hurdada uga kacdid.

320. Khibrad waa magac aan innagu ula baxnay qaladaadkeennii.

321. Noloshaada macno uma lahan hadalladaadu, waxaa macno samaynaya ficilladaada, waxa aad ku fikiraysid macno ma lahan, waxaa maco leh waxa aad samaynaysid.

322. Mar walba wejigaada ku aaddi halka ay qorraxdu jirto, wuu kaa dambayn doonaa hoosku.

323. Maanta waa shalaydii aad ka cabsanaysay.

324. Waallidu waa in lagu celceliyo hal shay ayadoo la filanayo natiijooyin kala duwan.

— Elestein

325. Wanaagga kaa buuxa waa inuu gubi karaa xumaanta kugu hareeraysan.

326. Maalin uun wax walba way hagaagi doonaan, hadda dhoollacadeey si' walba oo uu xaalku u qasanyahay, ogowna in wax walbaahi sabab ku dhacaan.

327. Quruxdaadu waxay billaabataa daqiiqadda aad go'aansatid in aad noqotid qofka aad tahay.

328. Sharaf ma jirto daacadnimada ka wayn.

329. Haddiiba aad u cabsanaysid mustaqbalkaada dambe cabsidu way ku dilootay, maxaa yeelay maanta ayayba ahayd in aad si' raaxo ah u noolaatid.

330. Nabad ma jirto lagu helo in nolosha laga fogaado.

331. Laguma dullaysanayo haddii aadan qofna wax ka rajeynin.

332. Haddii aad raadinaysid qofkii noloshaada wax ka beddeli lahaa waxaad hor istaagtaa miraayadda.

333. Raggu waxay jecelyihiin in ay haweenka u noqdaan jaceylkoodii ugu horreeyay, halka dumarku jecelyihiin in raggu uu u noqdo jaceylkoodii ugu dambeeyay.

334. Ku shaqayso aamusnaan, qeyladaadu ha ahaato keliya dhawaaqa guushaada.

335. Rajadu waa riyadii oo soconaysa.

336. Shallaayda laguma soo koobo keliya dhaqamadeenii qaldanaa, inta badan waxaan ka shalaaynaa wanaaggii aan u samaynay kuwii aanan u qalmin.

337. Saaxiibada waxaa u fiican midka kugu cabsi geliya carada alle, kuguna rejo geliya la kulanka alle.

338. Iska sabar, laguuma imtixaanin in dhibka lagaa dul qaado mooyee.

339. Dhib ma lahan in aan u jihaysanno meeshii aan farxad ka heleyno, waxaa dhib ah in aan ku sii soconno waddo ay awooddeenu ku dhiig baxayso ayadoo aanan waxba na loo cayminaynin.

340. Geeridu ma sugayso ilaa aad ka noqotid qof toosan, adigu toosnaaw oo geerida sugo.

341. U samafalka labadaada waalid waa qiso aad adigu qoraysid oo ay carruurtaaduna werinayaan.

342. Noloshu waa sida suuq weyn oo kale, waad ku dhex wareegaysaa waxaadna qaadanee wixii aad uga baahan tahay, balse xusuusnaaw in xisaabka alaabahaada aad qaadatay aad bixinayso.

— Lama yaqaanno

343. Waxyaabaha aanan soo noqonin waxay kala yihiin: hadalka markuu afka ka soo baxo, waqtigu haddii uu kaa tago iyo kalsoonidu haddii ay dhunto.

344. Jaahilku ma ahan qofka aanan wax qori aqoonin waxna akhrin aqoonin, jaahilku waa qofka garanaya jihada qiblada ee aan haddana tukanaynin.

345. Mid ka mid ah dulmiga ay bulshadu ku kacdo waa in ay u raadiyaan gabar wanaagsan wiilkooda xun.

346. Dhabarkaada in aad rukuucda salaadda u dunto waxay daawo u u tahay toosinta qalbigaadii qalloocday.

347. Qoysasku maalmahaan waxay noqdeen shakhsiyaad wata furayaal fara badan oo hal guri uun lagu furo.

348. Ilaahay wuu ogyahay in aad sabartay waqti ay adagtahay wuuna kaa abaal marinayaa.

349. Shayga in la waayo ayaa lagu ogaadaa qiimihiisa.

350. Ha ka sugin qofna inuu kuu naxariisto, baro in waxbixintu ay dhaqan tahay oo aysan ahayn wax kala bedelasho.

351. Wax walba way is bedelayaan marka laga reebo dadka ka run sheega dareemadooda, isma bedelaan kuwaas.

352. Ha ka mid noqonin kuwa dadka hantida leh u hadiyeeya dharka qaaliga ah, masaakiintana siiya dharkii iyaga ka dhamaaday.

353. Casharka saaxiibtinimada waa inuu ka soo hormaraa cashirka jacaylka. Casharka xorriyadduna waa inuu ka soo dib dhacaa casharka ixtiraamka.

354. Qofka ku haboon inuu abuuro marmarsiyaha beenta ah ma jiro wax kale oo uu ku haboon yahay.

355. Wax ka qurxan ma lahan in aad ka aamustid mid kaa sugaya in aad la murantid, iyo in aad ku qososhid mid kaa filayay in aad ooyi doontid.

356. Xusuustu waa magaalo aanan hurdin.

357. Waxa maanta ku dhaawacay ayaa berri kaa dhigaya qof adag.

358. Guurku waa nasiib kalatagguna waa go'aan, murugadu waa nasiib farxadduna waa go'aan, qof inaa xiriir la yeelato waa nasiib in aad kala hartaanna waa go'aan. Dhammaanteen nasiib ma lihin balse go'aan ayaan leenahay.

359. Ii macneey raganimadaada markii aad maqlaysid gabar ooyneeso oo aad adiga ka dambaysid sababta ooyinteeda.

360. Aamusnaanta ayaan xiranaa marka uu nagu yaraado dharka hadalku.

361. Qasaaradu ma ahan in aad waysid qof aad jeclayd, qasaaradu waa in aad waysid naftaadii adigoo isku dayaya in aad raali geliso qof aadan wax qiimo ah ugu fadhin.

362. Inta gadaal u laabatid ma bedeli kartid qaladaadkii noloshaada oo dhan, waxaadse ka bilaabi kartaa halka aad maanta joogtid in aad wanaajiso mustaqbalkaada.

363. Kuwa daciifka ah way aarsadaan, kuwa adagna way cafiyaan, kuwa caaqiliinta ahna way iska indhatiraan.

364. Indhaha nacaybku waxay arkaan ceeb walba, indhaha jaceylkuna ceeb ma arkaan.

365. Jacaylka wuxuu leeyahay dhabar uu guuldarada ku ximbaaran karo, balse nacaybku ma lahan gacmo uu ku qaato koobka guusha.

366. Guurku waa naf hurid ay samaynayaan laba ruux si' ay uga farxiyaan shacabka labada saacadood ee la joogo hoolka arooska.

367. Hadal marka ay erayadaadu ka qiimo badan yihiin aamusnaanta.

368. Iimaankaadu waa inuu ka sareeyo cabsidaada.

369. Guuldarradu ma ahan in la dhaco ee waa in aanan laga kicin meeshii lagu dhacay.

370. In lagu dhaqmo caadooyinkii hore macnaheedu ma ahan in dadkii hore ay soo noolaanayaan ee waxay la macno tahay in dadka hadda nool yihiin kuwo dhintay.

371. Habaar oo dhan waa dhimo, duco oo dhanna waa dhuroow.

372. Inta aad riyoonee waxaa tahay qof nool, maxaa yeelay kuwa dhintay ma riyoodaan.

373. Naftaada waxaa ku dhex dagaalamaya wanaagga iyo sharta, waxaana guulaysanaya midkii aad adigu quudiso.

374. Xikmad walba waa hadal, balse hadal walba xikmad ma ahan.

375. Ha rumaysanin hadal walba oo qurxan, xaqiiqada ka ogow mawaaqifta ama goobaha qaar kana soco.

376. In wax la bilaabo dadka oo dhan ayaa kara, in la joogteeyana kuwa runta badan oo keliya.

377. Laguuguma cariirinayo nolosha inta aad caabudaysid rabbigii kutaabkiisa ku yiri " raxmadayda ayaa ku waasac noqotay wax walba"

378. Beenlowga ayay waajib ku tahay in uu wax walba xusuusnaado.

379. Ha isku dayin in aad lo'da ku qancisid in tufaaxu ka macaanyahay cowska, taas bedelkeeda isku day in aad naftaada ku qancisid in aysan waxba kaa gelin cuntada lo'da.

380. Ha dhaaranin markii aad been sheegaysid maxaa yeelay hal dambi ayaa kugu filan.

381. Wax yar oo layska indhatiro insaanka waxay soo saaraysa shakhsiyaddiisa runta ah.

382. Noqo qof u wanaagsan dadka oo dhan maxaayeelay waxaa jira ilbiriqsiyo ay macquul tahay in aad dunida ka rawaxdo kuwaas oo aanan lahayn waqti cayiman.

383. Dadka ayay jannada ugu yeerayaan mana awoodaan in ay miiska quraacda ugu yeeraan masaakiinta baahan.

384. Iska indhatirku wuxuu sadaqo jaariyo ah ku yahay kuwa ay edebtu ku yartahay, dhacdooyinka qaarna waa sida waqtiga dayrta oo waxaa ku dhacaya dadka dhalanteedka ah sida ay u dhacaan caleemaha geedka oo kale.

385. Duruufaha dadka qaar waxay u duugan yihiin si' qoto dheer, haddii aadan arki karin fadlan dadka ku karaameey in aad malahaada u wanaajisid.

386. Waxaa jira qof kuu hadiyeynaya jaceyl adigoonan waxba u hadiyeyn iyo qof kuu hadiyeynaya dhaawac kaddib markii aad u hadiyeysay wax walba.

387. Wax aanan duco ahayn ma haysanno, balse ducada darteed wax walba ayaan ku helnaa.

388. Noloshu way gaabantahay mana mudna xaasidnimo iyo hagar, berri waxaan noqonaynaa xusuus oo keliya, keliya dhoollacadeey oo iska cafi kuwii ku xumeeyay maxaaa yeelay jannadu waxay u baahantahay in laabteennu ay saafi ahaato.

389. Cabsidu kaama hor istaagto geerida ee waxay kaa hor istaagtaa nolosha.

390. Qofka sharafta leh waa kan aad u qabato adeeg yar ee kuugu mahadceliya sidii in aad wax walba u samaysay, kan liitana waa mid aad naftaada u hurtay ee aaminsan in aadan waxba u qabanin.

391. Mar walba oo ay noloshu soo saarto culaysyadeeda garbahaada dushooda; ogow in rabbi uusan nafta ku kallifin wax aanan awooddeeda ahayn.

392. Waxaa lagayaabaa in aadan dhimanin markii ay rasaastu kugu dhacdo, balse aad dhimato markii aad aragto qofkii kugu soo riday.

393. Quruxdaadu kaama dhigi karto qof dhoollacadayn badan, balse dhoollacadayntaadu waxay kaa dhigi kartaa qof qurux badan.

394. Quruxda waxaa dhamaystir u ah laab xaarnaan.

395. Daqiiqadda ugu qurxan waa marka uu dhab noqdo shay aad u soo sabartay.

396. Guur walba oo guulaysta wuxuu ka kooban yahay nin sameeya waxa ay haweenaydu rabto, iyo haweeney samaysa waxa ay iyadu rabto.

397. Siyaasaddu ma abuurto mowqif ka dhan ah qofka ay is haayaan hoggaamiyahaada, iska ilaali in aad ku ambato siyaasiyiinta dhexdooda.

398. Noloshu ma bixiso casharro bilaash ah, mar walba oo aan idin dhaho "noloshu waxay i bartay" xaqiiqsada in aan bixiyay qiimaha waxbarashadaas.

399. Waxaa wax la la yaabo ah in qalbigaadu uu murugaysan yahay oo uu wejigaaduna faraxsanyahay, waa sida adigoo jecel subaxa haddana habeenkii dhafraya, qalbigaada ayaa holcaya ficilladaaduna waa kuwo qaboow.

400. U soo kac salaadda subax, xattaa waxaa xilligaas jira layr qaboow oo saafi ah maxaayeelay munaafiqiintu way hurdaan xilligaan.

401. Buushka xaqiiqada ayaa ka wanaagsan qasriga dhalanteedka.

402. Mar marka qaar in hoos loo soo dhaco waxay la mid tahay marka kubadda kolaygu ay gool noqoto, mana ahan guuldarro.

403. Daacad nimadu waa shay qaali ah ee ha ka rajaynin qof raqiis ah.

404. Ceebaha jirka waxaa lagu qarin karaa hal mitir oo dhar ah, balse ceebaha fikirku waxay ka muuqanayaan dood walba.

405. Iska illow wixii tegay iskana illow hadalka dadka, maxaa yeelay ma jiro qof tartan ku guulaystay isagoo gadaal eegaya.

406. Na looma abuurin in aan joogayno ee adigu abuuro raad wanaagsan oo joogaya geeridaada kaddib.

407. Ma rabtaa in aad aragtid waxgarad, aqoonyahanno iyo macallimiin hareerahaada jooga; keliya khalad yar sameey.

408. Ama malab iibi ama basbaas, waa isku mid haddiiba carrabkaadu uusan farqi samaynaynin.

409. Marmarka qaar in qof la siiyo fursad labaad waxay la mid tahay ayadoo la siiyay rasaas dheeri ah maxaa yeelay middii hore kuguma uusan dilin.

410. Naf walba waxay dhadhaminee geerida, balse naf walba ma dhadhaminayso nolosha.

411. Quruxda qofku waa saddex: in uu qariyo saboolnimadiisa ilaa ay dadku dhowrsanaantiisa darteed u maleeyaan inuu hantiile yahay. Inuu qariyo caradiisa ilaa ay dadku deganaantiisa umaleeyaan inuu raali yahay. Inuu qariyo dhibka haysta ilaa dhoollacadayntiisa loo maleeyo inuu barwaaqaysan yahay.

412. In qalbiyada la jebiyo iyo in la kasbado waxaa u dhaxeeya tolmo magaceeda la dhaho asluub.

413. Roobku wuxuu soo da'aa markii ay daruurti qaadi wayso culayska biyaha, illintuna waxay soo dhacdaa marka uu qalbigu qaadi waayo culayska dhaawaca.

414. Ha furin laabtaada ilaa aad ka hubsatid daahirnaanta qofka doonaya inuu dego.

415. Hurdada ka hor xiro dharka kuugu qurxan, is carfi qolkaadana hagaaji, maxaayeelay maalmahaan kuwa riyada noogu imaada ayaa ka sharaf badan kuwa waaqica noogu imaada.

416. Mar walba oo aad damacdo in aad is dhiibtid ka feker kuwa jecel in ay ku arkaan adigoo guul-darraystay.

417. Xaaladaha qaar waa sidii qaxwada, waa qaraar balse waxay kaa dhigee qof indhihiisu furanyihiin oo soo jeeda.

418. Midabka cusbada iyo kan sokorta waa isku mid, balse waxaa lagu kala gartaa dhadhanka.

419. Diinta inta aad haysato ha ku qancin balse adduunka inta aad haysatid ku qanac.

420. Ruuxii u halgama dad juhalo ah wuxuu la mid yahay qof naftiisa dab ku qabtay si' uu waddada ugu iftiimiyo qof indhoole ah.

421. Mar walba oo dadkii hore ay taageerayaal kuu wada noqdaan waxaad u baahantahay cadaw cusub.

422. Waa ukunta iyo ballanta kuwa ugu hor jebi og.

423. Ha garaacin albaabka qof haween ah haddii aadan wadanin boorsooyin xiiso ah.

424. Farxaddu waa xornimo, xornimaduna waa in aad sii waddaa noloshaada caadiga ah dardaaran la'aan.

425. Dadka qaar ma garanayaan sidii ay kuu ilaashan lahaayeen, haddana ma doonayaan in aad ka tagtid oo aad cid kale ka aadid.

426. Ma arki kartid xiddigaha ilaa uu mugdigu noqdo mid daran, dadka qaarna waa sidaas oo macnahooda waxaa la gartaa markii uu dhib jiro.

427. Wax aadan ahayn ha iska dhigin, wax aad tahayna ha uga cabsan in laguugu amaani waayo.

428. Ha joojin isku daygaada xagga guusha, ha na niyad jabin haddii aad kuftid maxaa yeelay lama sheegin qof kufay isaga oo fadhiya.

429. Ha ka mid noqon safafka xiisaha ee ka mid noqo safafka xaqiiqada.

430. Qofka hortaada socda kuma arki karo, kuwa ku arkaya ee wax kaa sheegaya way kaa dambeeyaan.

431. Isdhexgal baa kalsooni leh, wadajir baa awood leh, midnimaa jacayl leh.

432. Sida ugu degdegga badan ee xanta loo joojin karo waa in qof walbaahi aamusaa.

433. Haddii aadan istiraatiijiyad lahayn waxaad ka mid tahay cid kale istiraatiijiyadeeda.

434. Qiimee naftaada ha na u qabanin wixii hore.

435. Dadka qaar ayaa aaminsan haddii ay meel kale tagaan in ay farxad ku helayaan, arrinta sidaas ma ahan maxaa yeelay naftaadii halkaan isbedelka ku samayn wayday ayaad hore u sii qaadanaysaa!

— Neil Giman

436. Qofkii wax badan arka wuxuu hadlaa wax yar, qofkii wax yar hadlana wuxuu aamusaa inbadan, qofkii inbadan aamusana wuxuu gartaa wax badan, in wax badan la gartana waa billowga xikmadda.

437. Haddii uusan isbuuciiba hal qof kugu dhihin waad waalantahay ogow in aadan caalamka ku lahayn wax saameyn ah.

438. Ka digtoonoow murugta, carada iyo quusta, maxaayeelay waa kuwa ka daran cadawgaada.

439. Qofkii ku siiya kalluun shiilan wuxuu ku quudiyay maalinkaas, balse qofkii ku bara sida kalluunka loo dabto wuxuu wax ku taray cimrigaada inta ka dhiman.

440. Qofkii raadiya saaxiib ceeb la'aan ah wuxuu noolaadaa asigoo keli ah, midkii raadiya xaas ceeb la aan ahna wuxuu noolaadaa isagoo doob ah, midkii raadiya qaraabo dhib la'aan ahna wuxuu noolaadaa isaga oo qaraabo goys ah.

441. Ha murgin haddii ay dunidu ciriiri kugu noqoto, waxaa lagayaabaa in rabbi uu jeclaaday inuu maqlo codkaada adigoo baryaya.

442. Maxay taraysaa waxbarashadaadu haddiiba aad waddada ku tuuraysid qashin kaddibna uu ka aruurinayo qof aanan waxba soo baranin.

443. Ha u abuurin ubax qof aanan waraabin doonin.

444. Waxaan nahay bulsho rabta in ay u noolaadaan sidii reer galbeedka, haddana raba in ay u dhintaan sidii saxaabada.

445. waxaa lagayaabaa waalidiintaadu in aysan kuu samaynin wixii aad u baahnayd oo dhan, balse waxaa hubaal ah in ay kuu sameeyeen wixii ay awoodeen oo dhan.

446. Ha xasdin qofka aad ogtahay inuu leeyahay xusuusta fog, maxaayeelay ma hilmaamayo xusuusta dhaawaciisa.

447. Insaanku laba sabab ayuu isku beddelaa; marka uu ogaado wixii uu doonayay wax ka badan iyo marka uu xanuunsado inkabadan intii uu mudnaa.

— Lama yaqaan

448. Ninna nin looma caayo dumarna dumar looma amaano.

— Farxiyo lama filaan

449. In laga fogaado tartanka nolosha nafteeda ayaa tartan ah, in guuldarada la inkirana waa guuldarro, in la qariyo waxa laga xishoonayana waa xishoodkii oo aan arkayno.

450. Karaamadu waa furin dagaal oo ay ku dhamaanayaan kun saaxiib.

451. Qof walba ayaa wixii xun farta ku fiiqi kara, balse wanaagga dad yar baa arka.

452. Ruuxii doonaya inuu jaceylka ka ganacsado wuxuu la mid yahay qof doonaya inuu tiitiin liqo qodaxna aysan mudin.

453. Ha isla waynaanin cilmi walba oo aaad leedaahaay iyo hanti walbaba; noqo sida geedka miraha, mar kasta oo mirihiisu bataan waa mar walba oo uu hoos u soo hoobto.

454. Ummadi waxa ay jabtaa marka ay waydo madax ka garasho sarraysa shacabka.

455. Daawada keliya ee cudurka qabyaaladdu waa socdaal aad ku dhex martid dalka iyo dadka.

456. Markii taleefanku uu ahaa mid leen leen ah dadku waxay ahaayeen xor.

457. Ha ka mid noqonin doqomada aanan waxba cunin marka arrimaha qaar ay qasan yihiin, maxaa yeelay dembi ma lahan mindhiciirrada calooshaadu.

458. Wanaag qabo abaaal marinna cidna ha ka sugin waa sirta guusha.

459. Haddii dhibka jira aad u gudbisid maamulaha waxaad tahay weriye, haddii dhibka jira aad adigu xalkiisa keentana waxaa tahay hoggaamiye.

460. U adeeg hooyadaa, ayada ayaa ugu qurxan haweenka dunida oo dhan uguna run sheegis badan xagga jaceylka.

461. Ilmahaada ha dhaxalsiinin war xun oo qaraabadaada ku saabsan si walba oo wax xumi idiin dhex maraan adiga iyo qaraabadaada.

462. Farxadda meel dheer ha ka raadin, farxaddu waxay ku dhex jirtaa fikirkaada farshaxanka leh, malahaada wanaagsan, doonistaada rejo wanaagga leh iyo qalbigaada uu wanaaggu ka iftiimayo.

463. Geedka ay caleemuhu ka daataan wuxuu xaabo u noqdaa kuwa dhuxusha shida, haweenaydii maryaha iska daadisana waxay xaabo u noqotaa naarta.

464. Dhacdo walba oo xun oo kugu dhacda waxaa ku qarsan turid aadan ogeyn.

465. Ka fikir waxa aad haysatid, maxaayeelay waxaad ku heshay karaamada rabbi, wixii aadan helinna waxaad ku waysay xikmadda rabbi.

466. Carruurtaada ha ku dhihin salaadda aada, waxaad ku dhahdaa salaadda ii raaca si'aan jannada isula galno.

467. Inta badan tilmaamaha bini aadanku waa wax la iska dhaxlo ilaa dhaqanka dameernimada, kaas waa dedaal shakhsi ah.

468. Hadiyadda ugu weyn aan ilmaheenna siin karno waa inaan u noqonno ku dayasho wanaagsan.

469. Aamusnow ilaa lagaa codsado in aad hadasho, taasi waxa ay ka wanaagsan tahay in aad hadasho ilaa lagaa codsado in aad aamustid.

— Cali bin abii daalib

470. Qof walba oo aad u xiisto ma ahan mid kuu xiisaya, qof walba oo aad u laab xaarantahayna ma ahan mid kuu laab xaaran, haddiiba laab xaarnaantu aysan ahayn jaceyl dabiici ah wax faa'iido ah ma lahan jaceyl aad isku kalliftay.

471. Ma isku aragtay in qofkii gaarigiisu kaa xawaaro badiya aad ku dhahdid waa waalan yahay, qofkii aad ka xawaare badisidna aad ku dhahdid waa doqon.

472. Qaladka meesha ka saar, balse walaalnimada meesha ha ka saarin.

473. Jahligu mar walbaba waa wejiga labaad ee addoonnimada.

474. Mar walba insaanku wuxuu raadiyaa waxyaabo dhalanteed ah maxaa yeelay wuxuu ka cabsaday inuu xaqiiqada waajaho.

475. Waddaniga wuxuu ka fikiraa jiilka soo socda, siyaasiguna doorashada soo socota.

— Shakib arslaan

476. Ha qeylinin haddii aad aragtid dameer ku labisan dharkii faraska, maxaa yeelay ma foga waqtiga uu ciyi doono oo ay cid walba garan doonto.

477. Waxaa jira qalbiyo aanan aqoonin nacaybka si walba oo aad u dulmiso, iyo qalbiyo aanan aqoonin jacaylka si walba oo aad u darajayso.

478. Waxaa laaga yaabaa in maalin walba uusan kuu noqonin maalin kuu wanaagsan, balse maalin walba waxaa ku dhex jira shay kuu wanaagsan.

479. In aad u dhibtootid bilooyin go'aan sax ah oo aad qaadatay waxay ka fiicantahay in aad u dhibtootid go' aan qalad ah oo aad qaadatay inta noloshaaada ka hartay.

480. Kala fogaanshuhu qofna sooma dhoweeyo qofna ma fogeeyo, shaqadaas qalbiga ayaa iska leh.

481. Quruxda jirku waa uun oogada wax ka muuqda, balse xumaanta qofku waa mid dhiiggiisa inta raacda lafaha u dhaadhacda.

482. Nebi Yuusuf walaalihiis waxay dhaheen "ha la dilo yuusuf" boqorkii iibsadayna wuxuu xaaskiisa ku yiri u karaameey hoygiisa" sidaas darteed jacaylku wuxuu ka mid yahay irsaaaqadda rabbi.

483. Deeqsisanaa ibnu aadanku, haddii ay kuu waayaan cunto waxay ku dhahayaan alle ha kuu kaalmeeyo, haddii ay ceeb kuu waayaanna waxay kuu xirayaan ceebahooda.

484. Hal eray ayaa dumin kara riyada qof dhan, hal eray ayaana dhisi kara.

485. Dadnimada aqoonso!

— Hees soomaali

486. Waxyaabaha qaar way iska imaanayaan ayadoon lagu bixinin wax dadaal ah. waxyaabaha qaarna ma imaanayaan ayadoo lagu bixiyay dadaal oo dhan.

487. Ixtiraamka ayaa ah waxa ugu qurxan ee uu qofi u hadiyeyn karo qof kale.

488. In aanan mas'uuliyad la isa saarin ayaa ah sababta guuldarrada, qof walba wuxuu sugayaa in ay dadka kale wax uun billaabaan.

489. Wax ha xadin, dowladdu ma jeclo cid shaqadeeda kula loolantee.

490. Dadka waxaa u imaanaya waqti caafimaadku uu ka koobanyahay toban qayb, sagaal ka mid ah waa in dadka loo tanaasulo, halka soo harayna waa in la aamuso.

491. Guuldarradu waxay u sugnaatay geesiyaasha oo keliya, maxaa yeelay fulaygu dagaalba ma galo.

492. Sababta aysan dumarku u jeclayn kubadda cagta waa in aanan la helaynin kow iyo toban gabdhood in ay xirtaan hal labis oo isku eg.

— Files Diler

493. Birta haddii aanan la isticmaalin way daxalaysataa, biyaha haddii aanan la isticmaalinna way wasaqoobaan, caqliga aanan laga shaqaysiinin waa sidaas oo kale.

494.Haddii uu qofi kaaga tago daacadnimadaada darteed adiga ayaa guulaystay, maxaa yeelay caqliyada tabarta darani waxay doorbidaan doodda.

495. Waxaa jira hadal aanan waxba laga fahmaynin iyo aamusnaan wax walba laga fahmayo.

496. Haddii ukunta lagu jebiyo awood dibadda ka timid way u dhamaatay ukuntaas, haddiise ay soo jebiso awood gudaha katimid waxaa billaabanaya nolol cusub, umaduhuna waa la mid ukuntaas.

497. Dadku way ku nacayaan haddii aad tahay mid iyaga ka duwan, balse sida runta ah waxay jeclaan lahaayeen haddii ay yeelan lahaayeen qeyb ka mid ah geesinimadaada.

498. Cilmi nafsigu wuxuu leeyahay; suurtagal ma ahan qofi inuu jeclaado qof uusan arkin, taas waa been maxaa yeelay waxaan jecelnahay nabi muxammad s.c.w. annaga oo aanan arkin.

499. Kuwa dulqaadka badan waxay iska indhatiraan wax badan, waxay cafiyaan wax badan, balse markii ay tagaan dib dambe uma soo laabtaan.

500. Karaamadu waa in aad bixisaa wax ka badan inta aad awoodid, sharaftuna waa in aad qaadataa wax ka yar inta aad u baahantahay.

501. Billowga nolosha, ninka iyo caafimaadkiisu waxay isla raadinayaan hantida, dhammaadka nolosha, ninka iyo hantidiisu waxay isla raadinayaan caafimaadkii.

502. Haddii aalamiitadu ay gubi karto xayrta jirka, salaadduna waxay gubi kartaa dembiga.

503. Ardayda kuwa ugu fiican waxbarashada waxay noqdaan dhaqaatiir iyo injineerro, kuwa ku xigana maamulka iyo ganacsiga, kuwa ku sii xigana siyaasadda ayay ku biiraan waxayna hoggaamiyaan xataa labadii dufco ee ka aqoonta badnayd, waxaase layaab leh in kuwii aanan waxba baranin ay noqdaan odayaasha qabiilka ee ay dhammaantood talada ka qaataan!

504. Qofka iska indhatiraya xumaanta ma ahan mid aanan ka jawaaabi karin, ee waa qof gartay qiimaha midka xumeeyay ee iska indhatiray, wuxuu kaloo gartay qiimaha naftiisa wuxuuna ka ilaaliyay wax kasta oo aanan u cuntamin.

505. Karaamadaadu waa sida daawadii oo kale, ka fogeey meel ay ilmaha gacmahoodu gaari karaan.

506. Sababta keliya ee uu baadilku u sii jiro waa aamusnaanta kuwa leh damiirka nool.

507. Ilaahii ku asturay adigoo saaran saqafka macsida kuma fadeexaynayo adigoo ku hoos jira garbaha towbada.

508. Raaxo uma sugnaanin qof xaasid ah, saaxiibna ma galo mid laba wajiile ah, aragti ma lahan mid qiyaanoole ah, haybadna ma lahan mid dabeecad xun.

509. Qofka noloshaada macnaaha u leh ma ahan midka aad dareentid joogistiisa ee waa midka aad tabtid maqnaashihiisa.

510. Haddii aadan qof u noqon karin waaqic qurux badan, ha u noqonin xusuus fool xun.

511. Maalku waa adeege fiican iyo hoggaamiye xun.

512. Hoggaamintu ma ahan in awaamiirta la qaato oo keliya ee waa ku dayasho.

513. Mar kasta oo ay aqoonta qofku badato waxaa yaraada erayga "aniga" mar kasta oo aqoonta qofku yaraatana waxaa bata isla eraygaas.

514. Sharafkaada waa naftaadii labaad ee ilaasho si' aadan laba mar u dhimanin.

— Maxamed cali kalaay

515. Saddex ma rumaysto; qofka cabsan markuu dukanayo, hantiilaha markuu dhaaranaya iyo haweenayda marka ay ooyeyso.

516. Marmarka qaar isku daygaada aad ku muujinayso in aad tahay qofka ugu fiican ayaaba ihaano ah.

517. Haddii aad aaminsantahay in waxbarashadu tahay mid qarashkeedu badanyahay bal jahliga soo tijaabi.

518. Qofkii aanan ka mahadcelin barwaaqada uu haysto waxaa laga celiyaa isaga oo aanan dareemin.

519. Ninka wuu masayraa maxaayeelay wuxuu ogyahay xumaanta ragga, haweenaydu way maseertaa maxaayeelay waxay ogtahay dhagarta dumarka.

520. Markii guuldarradu badato waxaa kaloo bata heesaha wadaniyadda.

521. Noqo boqorka aad rabtid in aad la kulantid

522. Dharkaada ha ka dhigin waxa ugu qaalisan ee aad wadatid ilaa aad maalin ka ogaatid in naftaadu ka raqiisantahay waxa aad xirantahay.

523. Sideen uga dhaadhicin karnaa jiilka cusub in waxbarashadu tahay furaha guusha ayada oo ay nagu hareeraysanyihiin aqoonyahanno sabool ah iyo tuugo hantiilayaal ah.

524. Wax laga xumaado waxaa ah in aad ku nooshahay waddan aadan ku riyoonayn wax aanan ka ahayn in aad mar uun ka tagtid.

525. Dadkoo dhan waxay rabaan jannada inay aadaan haddana qofna ma rabo inuu dhinto.

526. Ma beddeli kartid jihada ay dabayshu ka imaanayso, balse waxaad beddeli kartaa jihada uu markankaadu u socdo.

527. Aamusnaanta lafteedu waxay leedahay cod u baahan qof fahma.

528. Waxaan nahay dad adag, hurdada ayaan ka kacaynaa si aan u noolaanno isla noloshii, isla dadkii, isla meeshii, taas lafteeda ayaaba raaxo ah.

529. Nebi Ibraahiim c.s. wuxuu jeclaan lahaa inuu aabihii muslim yahay. Nebi Nuux c.s, wuxuu jeclaan lahaa inuu wiilkiisa muslim yahay. Nebi Muxammad s.c.w. wuxuu jeclaa in adeerkii uu muslim yahay.

Aniga iyo adiga wuxuu rabbi naga dhigay muslimiin annaga oo aanan waydiisan ee dheh alxamdulilaah.

530. Ha aaminin qofka sabab la'aan kuu amaana adigoo la jooga, waayo adigoo maqan ayuug sabab la'aan kugu caayi doonaa.

— Ibraahim nolosha

531. Nolosha qaladka ugu weyn waa in aad ka tanaasusho mabaadiidaada.

— Gaandi

532. Ka fogaanshaheenna dadka looma fasiran karo nacayb ama isbeddel, keli ahaanshuhu waa waddan ay leeyihiin nafafka daalan.

533. Da'da ugu fiican ee ay ninka iyo naagtu isku fahmi karaan guurka waa wixii ka dambeeya siddeetanka, xilligaas iyaduna ma maqlayso isaguna ma fahmaayo.

534. Maxaa ka sahlan ka sheekeynta sabarka markii musiibadu aysan ahayn musiibadaada!

535. Dadka in runta lagu dhibo ayaa ka wanaagsan in beenta lagu raalligeliyo.

536. Haddii aad doonaysid in riyooyinkaadu ay run isu beddelaan waxa ugu horreeya ee lagaa rabo waa in aad hurdada ka kacdaa.

537. Diblumaasiyaddu waa in aad eeyga ula ciyaartaa si' deggan ilaa aad ka helaysid dhagax aad nafta uga qaadid.

— Lama yaqaan

538. Caddaaladda in la oogo ayaa inbadan ka dhib badan in la dumiyo dulmiga.

— Nelson Mandela

539. Haddii aad doonaysid in aad u noolaatid si' dheellitiran waa in aad noloshaada ka saartid kuwa markii ay kuu baahdaan ku hela, marka aad u baahatidna aadan heli karin.

540. Saaxiibka xun waa sida kaneecada, ma dareemaysid ilaa ay ku qaniinto.

541. Haddii qorshahaada uu yahay mid hal sano ah waa in aad bariis beeratid, haddii qorshahaadu yahay toban sano waa in aad geed mirood beeratid, haddiise qorshahaadu yahay boqol sano waa in aad dadka wax bartid.

542. Kuwa diiradda saaraya qaladaadka luuqadda ayagoo iska indhatiraya mowduuca waxay isoo xusuusinaayaan xikmaddii shiinaha ee ahayd " dayaxa ayaan u tilmaamayaa doqonkuna wuxuu fiirinayaa farahayga".

543. Wax kaste waa qurux markii aan rabno in aan u aragno inuu qurxan yahay, fikirkeenna annaga ayaa amarna.

544.Beentu ma qarin karto runta, keliya waxay dib dhigtaa waqtigeeda.

545. Koobkaada shaaxa ah si' walba oo aad sokor ugu dartid ma macaanaaanayo ilaa aad ku qastid, cilmi walba oo aad baratana ma qurxanaanayo ilaa aad ku shaqaysid.

546. Loollanka ugu adag wuxuu u dhaxeeyaa, deganaanta caqliga iyo deg degga qalbiga.

547. In daalka laga cabsado ayaa daal ah, in daalka lagu dul socdana waa raaxo.

548. Waxaa qasab ah in mar uun aad guursatid noloshaada haddii kale waxaad guurka u malayn doontaa waxa ugu fiican inta nolosha ka dhiman.

— Qoraa ruush ah

549. Dharbaaxadu kuma argagixiso ee waxaa argagax ah in dharbaaaxo la sugo.

550. Si walba oo aad wiilkaada ugu badiso talooyinka ma ka qaadanayo wax yar ma ahane, wuxuuse wax badan ka qaadanayaa ficilladaada.

551. Waqtiyadii hore, waxaa marmarsiyo loo samayn jiray ficillada xun xun, maantase waxaa marmarsiyo loo samaynayaa ficillada wanaagsan.

552. Haddii aad ka fiicantahay way ku xasdayaan, haddii ay kaa fiican yihiinna way ku yasayaan.

553. Dadka wanaagsan waxay imaadaan maarkii aan tabaarteenna ku dhamayno dadkii xumaaa.

554. Waa in aad tijaabisaa waxa aanan macquulka ahayn si aad u gaartid waxa macquulka ah.

555. Ninka filanaya in haweenaydu ay malag tahay waa inuu haweenayda u abuuro janno ay ku noolaato, maxaa yeelay malaa'igtu naarta ma degaaan.

556. Wixii la xaqiijiyo caddayn la aan waxaa laga hor imaaan karaa caddayn la aan.

557. Nolosha arday u noqo.

558. Xikmaddu waa baadida qofka muslimka ah, wuxuuna ka qaataa meeshii uu ku arko.

559. Xamaali waxaa ugu culus digsi faaruq ah oo saaran madaxa miskiin gaajaysan.

560. Haddii aad doonaysid in aad shacab qabsatid; abuur cadaw dhalanteed ah oo aan jirin, ka ddibna iska dhig mid ka badbaadinaya cadawgaas.

561. Kor u kaca caqligu wuxuu siyaadiyaa welwel, maxaa yeelay dadka ugu badan ee arrimaha ka welwela waa aqoon yahanno.

562. Geesi noqo oo qatarta wajah, ma jiro wax ay nolosha ku soo kordhiyeen cilmi baarisyada isbarbar yaacaya.

563. Dhammaantood way kugu qoslayaan, maxaa yeelay waad ka duwantahay, adiguna waad ku qoslaysaa maxaa yeelay waa ay isku wada egyihiin.

564. Munaafaqa dhabta ah waa kan aanan la garanayn khiyaanadiisa, maxaa yeelay si run ah ayuu beenta u sheegaa.

565. Haddii aadan helin hab ay lacag kugu soo gasho adigoo sariirtaada jiifa, waxaad nolosha ku dhamaysan doontaa xamaalinimo.

566. Kuwa dhintay waxay xabsi ku yihiin qabriga ayagoo ka shallaynaya wixii qabyada ka ahaa, kuwa noolna waxa ay xabsi ugu jiraan nolosha ayagoo dilaya wixii ay ka shallaayeen reer aakhiraadku, kuwaasna sooma laabana- yaan, kuwaanna kuma cibro qaadanayaan.

567. Maalmihii ugu fiicnaa nolosheenna waa xilligii carruurnimada markaas oo aanan ka cabsan jiri inuu qof naga tago, inuu qof na dhaawaco, inaan qof jeclaanno, waxa keliya aan ka baqi jirnay waa in ciyaarta nagala qaso.

568. Sida loo dhaqo marada marka ay wasaqowdo oo kale baa dembiga looga dhaqaa kuwa towbada u degdega.

569. Qof ha u xiisaynin si aad qof kale uga aarsatid.

570. Waxaa dhacda in dadka qaar ay doqon kuu arkaan markii aad kula dhaqantid doqonnimo u cuntamaysa dhaqamadooda.

571. Waxaa dhacda in dadka qaar ay kuu arkaan nin cafis badan ayagoo aanan ogeyn in ficilladooda liita ee ay kugula kaceen aysan u qalmin in aad ka jawaabtid.

572. Subax wanaagsan, haddii shalay ay ku murjisay waa maxay dambiga ay maanta leedahay oo aad u tusee wejigaada oo xanaaqsan.

573. Waqtiyadii hore qofka addoonka ah marka uu gaboobo waxaa la iibin jiray lacag aad u yar, balse maanta qofka dhallinyarada ah ayaa lagu iibsadaa mushaar bille ah oo keliya.

574. Markii aan yarayn baa na lagu dhihi jiray tuugadu waxay toos u aadi doonaan jahannamo, markii aan waynaanay waxaan aragnay tuugadii oo aadaysa paris iyo london.

— Lama yaqaan

575. Waxaa jira dad aad kala hadlaysid quusashada iyaguna kaala hadlaya rejada, waa dadka aan u baahannahay in aan deris ka dhiganno mar walba.

576. Hurda badnidu waxay caddayn u tahay illowshaha.

577. Ha guursanin qof salaadda ka tegay, maxaa yeelay sidii u fududaystay xaqqii uu rabigiis ku lahaay ayuu u fududaysanayaa xaqqaada.

578. Aaminsanaantaada ah in caalamku kuula dhaqmi doono si wanaagsan maxaayeelay adiga ayaa qof wanaagsan ah wuxuu la mid yahay in aad aaminto in libaaxu uusan ku cuni doonin maxaa yeelay waxaa tahay qof qudaarta uun cuna.

579. Markii aad hurdada ka kacdid subaxdii ayadoo ilaahay kugu irsaaqay maalin cusub in aad noolaatid oo aad fikirtid oo aad raaxaysatid; waxaad ka dhigtaa hadalkaada midka ugu horreeya "alxamdulilaah".

580. Farasku wuxuu socodka laba-laabaaa markii ay u muuqato xariiqda ugu dambaysa ee tartanka, adiguna laba jibaar cibaadada, maxaa yeelay camalka waxaa ugu wanaagsan waa midka ugu dambeeya.

581. Caradu waa sida dhiigbax gudaha ah, qofna ma arkayo balse xanuunkiisu wuxuu dhibayaa qofka uu ku dhaco ilaa uu ka halaagsamo.

582. Haddii aad gurigaada ehelkaada la joogtid oo cuntaduna miiska idiin saarantahay oo aad helaysid wax qabowga aad ka dugaashatid waad ka taajirsan tahay sida aad u malaysid ee noqo mid mahadceliya.

583. Hal mar oo keliya ayaad noolaanee, haddii aad qof u geftid ka cudurdaaro, haddii aad faraxdidna is celi, qof ha xasdin, qofna ha nicin.

584. Qofkii gacantiisa ku shaqaysta waa shaqaale, midkii gacantiisa iyo caqligiisa ku shaqaysta waa farsamayaqaan, qofkii gacantiisa, caqli giisa iyo qalbigiisa ku shaqaystana waa fannaan.

585. Haddii aysan ku cajab gelin qaab fikirkaygaa iyo dhaqankayga, ogow in aanan hurdada uga soo kicin maalin walba si aan adiga kuu soo jiito.

586. Wax badan ayaad fahmaysaa waana sababta aad u murugaysantahay, haddii aad dameer ahaan lahayd waa iska faraxsanaan lahayd.

587. Wax sii jiraya ma jiraan xataa awoodda, caafimaadka iyo haybadda.

588. Qofkii billoowgiisa dhibtooda waxaa la sharfaa dhammaadkiisa.

589. Raalligelin uusan isbeddel ka dambaynin waa marin habaabin, beentuna waa billowga dhagarta.

— Lama yaqaan

590. In aad damiso shumaca qof kale, ma kordhinayso iftiinka shumacaada.

591. Curad iyo maro cad ceebtu waa qaban ogtahay.

—Maahmaah soomaali

592. Wax kaste xaditaankoodu waa xaaraam marka laga reebo farxadda, taas meeshii aad ku aragtid xad, maxaa yeelay adiga way kuu wanaagsan tahay mana jiro sharci ciqaabeed ka yaalla in la xado.

593. Amaantu waxa ay ku bartaa garaadka qofku inta uu gaarsiisan yahay, dhaliishuna waxa ay ku bartaa dulqaadkiisa.

— Ibraahim Nolosha

594. Carruurnimadaadu waxa ay dhamaataa markii aad ogaatid in hurdada maalinku ay tahay wax laga maarmo oo aysan ciqaab joogto ah ahayn.

595. Hadaadan u halgamin waxa aad rabtid, hadhoow ha u ooyin wixii kaa luma.

596. Si aad u heshid waxa aad jeceshahay, ugu horayn waa inaad ku samirtaa waxa aad necebtahay.

597. Haddii aad laba qof wada jeclaatid waxaad doorataa midka aad gadaal ka jeclaatay, maxaa yeelay haddii aad midka hore si dhab ah u jeceshahay maba aadan jeclaateen midka dambe.

598. Marmarka qaar xaqiiqadu waxa ay u caddahay sidii qorraxdii haddana ma arki karno iftiinkeeda oo badan daraadiis.

599. Sababta ay xiriiro badan u go'een waa in loo kala gudbiyay hadallo aanan wanaagsanayn, noqda kuwo xumaanta ka indho la' oo ka dhego' la,.

600. Insaanka guulaystay waa midka shaqadiisa aada sidii asigoo la ballansan qof uu jecelyahay.

601. Caqliga xumi weligiiba wakiil kama dhigto niyad wanaagsan.

602. Cudurdaarrada oo dhan waa been, maxaa yeelay qofkii doona wuu awoodaa.

603. Buuraha ha u fuulin in uu caalamku ku arko ee u fuul in aad adigu caalamka aragtid.

604. Kuwa dadka cafiya waa kuwa ugu farxadda badan, waxay garteen qiimaha adduunyada umana aabbayeelin qaladaadka aadanaha.

605. Waa wax iska caadi ah haddii doonidu ay biyaha ku dhex jirto, waxaase halis ah haddii ay biyuhu doonida ku dhex jiraan.

606. Marka aad sariirta tagtid dadka iska cafi, markii aad hurdada ka soo kacdidna dadka u ducee.

607. Haddii aad aragtid haweenay dhar iyo labbis lagu riyaaqo leh oo aad ka hesho, u iibi xaaskaada si' uu muuqaalkaa qurxoon u lahaado dareen dhab ah.

— Badrudiin Jeesow

608. Difaaca danta qaranka waa loo dhintaa, difaaca danta qofkana waa laga dhintaa.

— Maxamed Dhaaley

609. Yeelo saaxiib aad wada qosli kartaan xattaa idinkoo ilko la'aan ah.

610. Gacmo wasaq leh waxay calaamad u yihiin lacag nadiif ah.

611. Haddii madaxweynuhu uu hal bil ka maqanyahay waddanka ma dareemaysid, haddii kuwa qashinka kaa qaada ay laba maalin kaa maqnaadaanna waad dareemee. Baro in aadan cidna yasin.

612. Waxaa lagu yiri" xijaabkaadu wuxuu kaa xiray albaabo badan. Waxay tiri "haa, albaabadaas waxaa ka mid ah midkii naarta".

613. Tacliintu waxay waddanka u ilaalisaa si ka daran sida ay ciidamada xuduuduhu u ilaaliyaan.

614. Siyaasiyiinta qaar haddii aad su'aal waydiisid waxay kuugu jawaabayaan qaab ay adiga xattaa dhib kugu noqonayso in aad fahamtid su'aashaadii.

— Aristo

615. Dadku waxay ku dheeraanayaan ka sheekaynta wax walba marka laga reebo qaladaadkoodii, kuwaas waxay u arkaan wax aan mudnayn in laga doodo.

— Socrats

616. Ku billaabo subaxaada qof aad jeceshahay si maalintaada ay u qurux badnaato.

— Maahmaah faransiis ah

617. Way ka soo horjeedaan in dumarka wax la baro, marka ay xaaaskoodu xanuunsatana waxay raadinayaan dhaqtarad.

— Dr. Cali Alwardi

618. In aadan doqonka u jawaabin ayaa ugu xanuun badan in aad u jawaabtid.

— Imaam Shaafici

619. Nin ayaa waydiiyay gabyaagii waynaa Bashaar bin barad "qof walba ee ilaahay uu indhaha tiro wax kale ayuu ugu beddelaaye adiga muxuu kuugu beddelay. Wuxuu wuxuu iigu beddelay in noocaaga oo kale aanan arkin".

620. Qaabka keliya ee aad naag go'aankeeda ku beddeli kartid waa in fikirkeeda ku raacdid.

— Goerge Bernard Show

621. Qofka keliya ee si caqli leh iila dhaqma waa harqaanlaha, mar waliba cabbir cusub ayuu iga qaadaa halka dadka kale ay cabbir hore iska haystaan igana filayaan inaan la ekaado!

— Goerge Bernard Show

622. Ma jiro wax ka sahlan in aad sigaarka iska dhaaaftid, boqolaal jeer ayaan sidaas sameeyay!

— Mark Twin

623. Ha ku calaacalin, ayagaba waa ogyihiin waxa ay samaynayaan.

— Aanis mansoor

624. Ilaah ayaa dadka daaweeya, dhaqtarkuna lacagta aayuu qaataa.

— Benjamin Fraklin

625. Saddex qof sir way qarin karaan haddii laba kamid ah ay dhimato.

— Benjamin Fraklin

626. Haddii aadan i aqoon igu karaameey in aad wanaag iga malaysato.

— Najiib Maxfuud

627. Markii uu dhintay Cabbaas bin Farnaas isaga oo isku dayaya inuu duulo reer galbeedku waxay iswaydiiyeen horta ma la duuli karaa?

Carabna waxay iswaydiiyeen. Shahiid miyaa mise wuu isdilay? Fikirka ayaa lagu kala tegay!

628. Mid indhoole ah ayaa soo baxay isagoo toosh wata si uu webiga biyo uga soo cabo. Mid baa ka horyimid oo waydiiyay maxaad ka faa iidaysaa tooshkaan waxba ma aragtide? Indhoolihii wuxuu yiri" waxaan u wataa si dadka indhaha leh aysan iigu dhicin.

629. In aad mar walba dhoollacadayso kama dhigna in aysan mushkilad ku haynin, balse waxaad go'aansatay in aad ka gudubtid.

— Goerge Bernard Show

630. Edeb meesha u sarraysa waa inuu qofku naftiis ka xishoodo.

631. Dagaalka wuu dhamaanayaa, madaxduna waa heshiinaysaa, hooyadaasna wilkeedii shaahiidka lagu sheegay ayay sugaysaa!

— Jabraan Khaliil Jabraan

632. Iska ilaali aqoon-beenaadka, maxaayeelay way ka khatar santahay jahliga.

— Goerge Bernard Show

633. Haddii aadan fahmin i waydii, haddii aadan igu raacsanayn aan ka doodno, haddii aadan ka helinna ii sheeg, balse adigoo aamusan ha i xukumin.

— Nasri Juka

634. Waqti dambe oo aadan waxba ka gaarin oo aad awoodaadii oo dhan aad gelisay baad ogaan doontaa in dadka iyo waxyaabaha qaar aysan u qalmin in aad muhiimad siiso.

635. Anigu qofna kama tago balse qof raba inuu baxo gacanta ma qabto.

— Darweesh

636. In aad ka dheeraato dogomada ma ahan islawayni, farqi weyn ayaa u dhaxeeya ka fogaanshaha iyo islawaynida!

637. Gudaheenna waxaa ka socda gugac, biriq, duufaanno iyo roobab aysan marna saadaasha hawadu sheegi karin.

— Maxamed Almaaquut

638. Adduunkaan ma ahan sida hooyadaa oo aad inta ka xanaaqdid aad ku qaylinayso maalinkii, habeenkiina casho kuu wacayso. Adduunku wuu iska kaa dhaafayaa ilaaa aad baahi u dhimatid.

— Filimka empire of the sun

639. Miskiin wuxuu jeclaaday timaheeda dhirirka badan, wuxuu ogaaday in carrabkeedu uu ka sii dheeryahay.

— Anees Mansoor

640. Tuuggu wuxuu rabaa maalkaada ama naftaada, balse xaaskaadu waxay rabtaa labadaba.

641. Xaasidnimadu waa fashalka meesha ugu dambeeya.

— Jan Jack Russo

642. Caalim lama doodin, haddii aan la doodana waan ka guulaysanayay, jaahil lama doodin haddii aan la doodana wuu iga guulaysanayay.

— Imaam Shaafici

643. Ha isdhiibin, waxyaabaha waaweyn waqti ayay qaataan.

— Mahmet Gaandi

644. Ima quseyso in aan waayo qof aan i rabin, waxaan waayay qof aan rabay welina waan noolaahay.

— Carrol may

645. Waxaan soo maray wadaad. Waxaan ku iri ma helayaa meel aan ku tukado?

Wuxuu igu yiri "qalbigaada daahiri, halkaad doontana ku tuko.

— Abuu yaziid Albustaami

646. Waxaan aaminsanahay in asxaabta ay weligood joogayaan, marka kuwii tegay oo dhan saaxiibo ma ahayn!

— Arosto

647. Haddii aad doonaysid in aad noolaatid adigoo keligaa ah, dadka u sheeg in aad sabool tahay.

648. Ma jiro qof lacag yeeshay isagoo shaqaynaya 8:00 am ilaa galabtii 5:00 pm.

— Paplo Escobar

649. Taleefannadeenna ayaa dhulka ku dhacay waana ka naxnay, saaxiibadeenna ayaa dhulka ku dhacay waana ku qosolnay.

650. Xushmee dareemada dadka kale, xataa haddii aysan adiga waxba kula ahayn iyaga ayay wax walba u tahay!

651. Ha akhrisan sheekooyinka guusha maxaa yeelay waxaad ka heli doontaa farriin oo keliya, balse akhriso sheekooyinka guuldarrada waxaad ka heli doontaa fikrad aad ku guulaysatid.

652. Qofka waddankiisa khiyaanaya wuxuu la mid yahay sida qof wax ka soo xaday guriga aabihii si uu tuugo ugu quudiyo, aabihiina ma cafinayo, tuugaduna uma mahadcelinayaan.

653. Nin xikmad badan ayaa la waydiiyay ma jiraa wax ka xun qofka bakhiilka ah?" wuxuu yiri "haa, waa qofka deeqsiga ah marka uu ka sheekeeyo dadkii uu wanaajiyay.

654. Dadka geesinimada iyo dadnimada leh mar walba waxaa jiraya qolo ay ula muuqan doonaan kuwo shar badan.

655. Anigu waxaan carrabkayga uga dhawaaqaa hadal aadan adigu ku dhiirran karin in aad maskaxdaada uga fikirtid.

— Distovisky

656. Lix lagu daray afar waa toban, saddex lagu daray toddobadana waa toban. Marmarka qaar in aad adigu saxantahay kama dhigna in aan anigu qaldanahay.

657. Dagaal midka ugu adag waa midka uu insaanku naftiisa la galo.

— Dr. Mustafa maxamuud

658. Dadka midka ugu caqliga badan oo ugu daahirnaanta badan waa midka dadka kula hadla si' u dhigaanta caqligooda.

659. Farxaddu waxa ay leedahay shan qodob. Ha xasdin. Ha murgin. Is dabci. Wax badan bixi. Wax yar filo.

— Charles Darwin

660. Hooyadu waxay awooddaa in ay daryeesho toban carruur ah, balse marmarka qaar toban carruur ah ma awoodaan in ay hal hooyo daryeelaan!

661. Guushu waxay ka imaato go'aanno saxan, go'aannada saxanna waxay ka imaadaan khibradda, khibradduna waxay ka timaadaa tijaabooyin fashilmay.

— Antonio Robnez

662. Dadku ma jecla runta iyo daacadnimada, dadku waxay jecelyihiin ku tiri kuteentaa iyo khiyaanada.

— Edmon Di Goncor

663. Wax waad akhrisan kartaa adigoo arigaada raacanaya, maxaa yeelay xiriir kama dhaxeeyo aqoonta iyo qaxwada!

664. Markii aad si khalad ah u fuushid tareen aanan ahayn midkii aad rabtay waa in aad degdeg uga degataa, marwalba oo ay masaafada sii dheeraataba waxaa badanaya qarashka soo laabashada.

665. Muslim ayaaan ahay, islaamkuna waa diin dhamaystiran balse anigu ma ihi insaan dhamaystiran. Haddii aan qalad galo diinta islaaamka ha ku eedaaynin ee aniga igu eedeey!

— Ahmed Diidaat

666. Ayadoo su'aalaha maalinka aakhiro ay isku wada mid yihiin oo na loo sii sheegay hadda dadka badankii way ku dhacayaan imtixaankaas!

— Adel Gamal

667. Quruxda dhaqankaadu way kaa haraysaa dhimashadaada kaddib, balse quruxda wejigaada waa mid carrada lagu duugi doono.

668. Farqiga u dhaxeeya doqonnimada iyo caaqilnimada waa in caaqilnimadu ay xuduud leedahay.

— Elestein

669. Xornimadu qofku ma ahan in uu awood u leeyahay in uu sameeyo wuxuu ii doono, xornimada qofku waa in uusan samaynin wax uusan doonaynin!

— Jan Juck Ruso

670. Markii ay daadadku dhacaan kalluunku wuxuu cunaa quraanshada, markii biyuhu ay guraanna quraanshada ayaa cunta kalluunka. Nolosha waxay fursad siinaysaa dadka oo dhan ee sug tookadaada!

671. Markii aad faraxsantahay si' qoto dheer u fiiri wejiyada dadka, waxaa kuu muuqanaya liis ku cusub noloshaada oo ciwaankiisu uu yahay "cadaw iyo saaxiib.

672. Waqtigu wuxuu beddelaa dhaqanka dadka ee ma beddelo jiritaankooda dambe, qofka asalka ihi wuxuu ahaanayaa asal xataa haddii uu derin ku seexdo, midka liitana wuxuu ahaanayaa mid liita xataa haddii xariir loo goglo.

673. Ha nicin qofka kaa masayra, maxaa yeelay wuxuu ku siiyay aqoonsi ah in aad ka wanaagsan tahay.

674. Ninku hadduu lacag badan helo wuxuu raadiyaa dumar, balse haweenaydu haddii ay lacag badan hesho ninba uma baahna.

675. Ha xiiseynin kuwa billowga wanaagsan, waxaad ilaashataa kuwa iyagoo wanaagsan weligood kula joogaya, maxaa yeelay billowga cid walbaahi way wanaagsan tahay.

— Nazaar Qabbaani

676. Haddii farxaddaada aad ku xirtid tirada sacabka ay dadku kuu garaacayaan ogow in fikirka dadku uu isku beddelo si joogto ah.

677. Markii aad aragtid in runtu ay dadka ka caraysiinayso xaqiiqso in aamusnaantu ay xikmad tahay.

678. Kelinnimadu waa in aad waysid sheekada qofkii aad jaclayd.

679. Shimbirka laanta yar ku taagani kalama jecla in ay la jabto, maxaa yeelay wuxuu ku kalsoonyahay baalashiisa.

680. Si aad u noolaatid odayaasha ka qaado caqli, carruurta ka qaado niyadwanaagga, fuqaradana dulqaadka.

681. Markii aad faraxsan tahay waxaad aadaa qofka aad dadka ugu jeceshahay, markii aad murugaysantahayna waxaad aadaa qofka dadka kuugu jecel.

682. Dhulku waa masaajid, wanaag in la sameeyo waa salaad, agoonta in madaxa loo salaaxo waa salaad, dulmiga in laga xigsado kuwa laga gardaranyahayna waa salaad.

-Maahmaah shiinays ah

683. In aad jeclaaato degganaanta, in aad iska indhatirto daalka, in aad isku kalsoonaato, in aad u tanaasusho doqomada, in aad hadalka yaraysid, in aadan waxba xiisaynin. Intaas ayaa laysku dhahaa korrinshaha shakhsi-yadda!.

684. Markii ay noloshu ku siiso hal sabab oo loo quusto waxaad adigu siisaa kun sabab oo aad howlahaada ku sii wadatid, maxaayeelay ma jiro wax ka xoog badan arlada dusheeda doonista insaanka.

685. Runtu waxay dhibtaa kuwa caadaystay in ay beenta marmarsiyo u sameeyaan ilaa laga rumaysto.

686. Marka ay ku leeyihiin ma samayn kartid, waxay ka hadlayaan awooddooda halka ay ku egtahay ee kama hadlayaan awoodahaada.

687. Haddii aadan adigu dhisan riyooyinkaada qof kale ayaa wuxuu kaa shaqaalaysiin doonaa in aad riyadiisa la dhistid.

688. Sharcigu waa in uu ahaadaa sida geerida oo kale taas oo ay dadku u wada simanyihiin.

— Montskiyo

689. Ragga runta ah ma sugaan sanado gaar ah si ay raganimadooda u muujiyaan, waxay dhashaan ayagoo rag ah.

690. Haddii aad si gaar ah iila taliso waad i waanisay, haddii aad dadka hortooda igula talisana waad i fadeexaysay!

— Imaam Shaafici

691. Si aad u dhoollacadaysid ma ahan in aad farxadda sugtid ee waa in aad dhoollacadaysid si aad u faraxdid.

— Ibraahim Alfiqi

692. Waxaan xiranayaa ookiyaalihii ayeeyaday si aan u arko sidii ay dunidu ahayd xilligeedii.

— Darweesh

693. Bakhiilka wuxuu u dhintaa baahi, ilmihiisuna waxay u dhintaan daaco qurun!

— Goerge Bernard Show

694. Shalay waxaan raadinaynay xornimada, maanta waxaan raadinaynaa jacaylka, berri waxaan ka cabsanaa in aan bini aadannimada wayno!

— Darweesh

695. Boos uga hel naftaada figta sare, meelaha hoose waxaa jira cariiri badan.

696. Qofkii raadinaya sinnaan waa inuu qabuuraha aadaa.

697. Libaaxu wuxuu dhimashada ku leeyahay sharaf uusan eeygu nolosha ku lahayn.

— Michael Na'imah

698. Hantida iyo dadka uu rabbi siiyay waa saddex:

1. Nin ay u taallo (waa nin sadaqaystay oo ay aakhiro u jirto). 2. Nin ay ku taallo (nin ay ka muuqato oo ku xaragoonaya).

3. Nin ay ka taallo (nin ay bankiga ugu jirto oo aanan ku xaragoon sadaqana aanan ka bixin).

699. In dadka kale aad cafisid macnaheedu ma ahan in ay u qalmeen in la cafiyo, balse adigaa ayaa u baahan nabadda.

700. In aad ku faanto wixii tegay kuuma damaanad qaadayso in aad mustaqbalka wax noqon doontid, maxaa yeelay sharciyada ciyaaruhu waxay isku bedbedelaan si joogto ah.

701. Ninkii dhahay saboolnimadu ceeb ma ahan wuxuu rabay inuu sii hadlo oo uu yiraahdo waa dembi, balse kuwo hantiilayaal ah ayaa hadalkii uga kala jaray sacab aanan kala joogsi lahayn.

702. Gabar ha waydiinin da'deeda, ninna ha waydiinin mushaarkiisa, arday ha waydiinin natiijadiisa imtixaanka, dowladna ha weydiinin waxqabadkeeda!

703. Haddii hodantinimadu ay tahay natiijo ka dhalata shaqo badan oo la qabto hooyo walba oo afrikaan ah ayaa noqon lahayd milyuneer.

— Maahmaah afrikaan ah

704. Caddaalad kama rabno wadamadeena illeen kama helaynee, waxaan dalbanayaa in dulmiga xattaa na loogugu qaybiyo si' caddaalad ah.

— Lama yaqaan

705. Kubadda cagta waxaa laga dheelaa maskaxda, luguhu waa uun qalab aad isticmaalaysid.

— Andreo Pirlo

706. Haddii aad doonaysid in aad farxad ku noolaatid ha ku dheeraan doodaha, dhacdooyinka ha fisirin, maxaa yeelay luulka waxaa la soo helaa isagoo dhuxusha u eg!

707. Dad badan baa taabanaya qalbigaada, kuwo yar ayaa gelaya qalbigaada, balse hal qof ayaa degaya!

+

708. Markii aan hadlayno dhammaanteen waxaan nahay dad mabaadii' leh, markii ay waxqabad tagtana waxaan nahay dad dano leh!

— Anees Mansoor

709. Dhibicda biya ah haddii ay si isdaba joog ah dhulka ugu dhacdo god ayay qodi kartaa, balse baaldi buuxa haddii hal jeer dhulka lagu shubo god ma qodi karo. Baro in ku celcelinta ficilka wanaagsan ay tahay billowga guusha.

— Lama yaqaan

710. Allaah ka cabsada inta aad awooddiin.

— Aayad qur'aan ah, surat taqaabun

Dhammaad